

DUGSIYADA DHEXE
SHEKOORYINKA
CARRUURTA

XEEBTII DAHABKA IYO

WAAYIHI SAXARDIID
JARISKAXUURKII YARAA

XASAN AW DAAHIR QAALIB

Muqdisho, 1977

SHEKOYINKA CARRUURTA
DUGSIYADA DHEXE

XEEBTII DAHABKA IYO

WAAYIHII SAXARDIID

JARISKAXUURKII YARAA

XASAN AW DAAHIR QAALIB

Muqdisho, 1977

XEEBTII DAHABKA IYO WAAYIHII SAXARDIID

Saxardiid wuxuu ahaa wiil yar oo ogoon ah. Hooyadii iyo aabbihiiba isaga oo aad u yar ayey dhinteen. Wax dhaxal ah, maal iyo moodba midnaba, uu ku noolaado, ugama ay tagin. Qareen iyo qaraabana wuxu lahaa oday u abti ah. Odaygana waxa la odhan jiray Timir. Timir wuxuu ahaa oday sabool ah. Magaalada ay saxardiid iyo iyo abtigii deganaayeen waxay ku tallay bad agteed. Markaa Timir wuxuu ahaa kalluumayste. Maalin walbana wuxuu ku kallihii jiray badda oo kallunka ka soo ugaadhsan jiray; dabadeedna wuxuu gayn jiray magaalada oo uu ka soo iibin jiray. Timir wuxuu lahaa haweenay iyo gabadh yar. Waxaanu ku noolaa guri yar oo badda agteeda ah.

Saxardiidna qoyska abtigii ayuu la joogi jiray. Abtigiina aad ayuu Saxardiid ugu kalgacalo iyo naxariis badnaa. Hase yeeshoo kalgacalada abtigii waxa ka qadhaadheeyey haweenaya agtigii. Haweenaydaas oo wiilka Saxardiid ula dhaqmi jirtay si aanay marnaba ammaan ku lahayn.

Haweenaydu waxay ahayd mid aad u naxariis daran. Waxay ku hayn jirtay wiilka xumaan aan xad lahayn. Hadday la hadlayso dirir iyo kulayl ayey kula hadli jirtay. Hadduu wax yar oo gaf ah sameeyana dilmo raxmad la'aan ah ayaanay waxba ula hadhi jirin. Had iyo goorna waxay qabo odhan jirtay shaqo aanu qaban karayn. Waxaas oo dhib, dilmo iyo naxariis la'aan ah aad iyo aad ayuu Saxardiid u dareemi jiray oo ay calooshiisa u gubi jirtay, hase yeeshoo wuu u dul qaadan jiray. Markuu cid kale uu dulmigaa u qabo ugu cawdo waayana wuxuu u tagi jiray gabadh abtigii oo uu waxa uurkiisa gubaya uga sheekayn jiray. Gagadha abtigiina waxay ahayd gabadh yar oo naxariis badan, qalbi furan, dareen kalgacalo iyo hilow ilaahay ku abuuray leh. Mar allaale markaa Saxardiid isaga oo murugo iyo tiiraanyo naftiisa yari qaadi kari la'dayah uu ula yimaadana, way ka baabi'in jirtay oo ay wehel suuban uga noqon jirtay, ilaa ay karka haya ka qaboojiso oo ay naftiisa farxad iyo fududaan geliso.

Inkasta oo Saxardiid ahay markaa wiil yar oo aan weli laftisu adkaan. Wax hawl muruq oo adag oo u qaban kara-yaana aanay jirin, hase ahaatee, haweenaydii abtigii may tix-gelin taa. Timir ayey kula talisay in uu Saxardiidna shabaq uu ku soo kalluumeeyo u soo iibiyi, si uu isna geestiisa reerka ugaga soo shaqeeyo. Saxardiid baa markaa shabaq loo soo iibiyey. Haddaba, sidaan hore u soo sheegnay, inkasta oo uu ahaa wiil da'disu aad u yartahay, wax aqoon ah oo uu kalluumaysiga u lahaana aanay jirin; sinaba wuu u diidi kari waayey amarka aayadii. Shabaqii baanu degta u ritay oo xaggii badda ayuu u kacay.

Subaxdaa Saxardiid kalluumaysiga ugu horraysay, waxay ahayd subax dhulku kulul yahay, dabaylina aanay jirin, bad-duna fadhido. Saxardiid baa baddii wax yar sidaa u eegay. Markaasuu jeclaystay daganaanshihi biyaha iyo hirar la'aantii. Ilayn waa inan yare, intuu mar kali ah iska ilaaway kalluumaysigii loo soo diray, ayuum baa waxa ku soo dhacay dabbaalo. Shabaqii iyo maryihii "intuu badda xeeligeedii dhigtay ayuu biyihii galay. Dabbaasha ayuu aad u yaqaanay oo markiiba intuu quusay ayuu hore ugu fogaaday baddii. Halkii buu, dabadeed ilaa intuu kaga dhergayey biyihii ku ciyaarayey. Markuu biyihii ka soo baxay ayuu is yidhi maryahaagii xidho, waaba maryihii oo aan meeshiiba oollin. Markaasuu midig dayey oo bidix dayey oo dhan walba eegay, waa xeeligi oo aan qofna ka muuqan. Tolow yaa baas ee maryihii qaataay. Saxardiid bay talo ku caddaatay. Dhabanada intuu qabsaday ayuu isaga oo la moodo in cirkii ku soo dhacay oo dhulkiina laga hoos qaaday, iska fadhiistay badda agteeda. Cabbaar markuu halkii fadhiyey isaga oo cadhaysan oo nacdal korka uga tuuraya tuuggaa baas ee maryihisi ka xaday, ayuu ugu dambaystii sara kacay oo dabadeed intuu wax allaale wax uu xidho waayey shabaqii ku soó kalluumayso la yidhi isku duubay oo xaggii gurigii u soo hadaafay. Markuu gurigii sheed kaga soo baxay, ayaa waabase aayadi oo irrida sii taagan. Hadday aragtay inaanu waxba kalluun sidin, qaawan ya-

hayna, qaaraa bay la soo boodday oo dabada u qabatay. Isagoon aanay nafba kaga tagteen, ayaa Ilaahay abtigii u bixiyey, oo uu ka qabtay.

Subaxdii dambe ayey misoole hawnaydii toosisay inankii Saxardiid. Markaasay ku khasabtay in uu kalluumaysi tago, ugana digitay in aanu fara madhnaan ku soo noqon sidii shalay. Halkii buu dabadeed isna intuu shabaqii baasaa degta u ritay, xaggii badda u kacay. Markuu baddii gaadhad ayaa wuxuu arkay iyada oo dabayle weyni dha-cayso oo baddiiba duufaan ku kacay, hirarkuna isdhirbaaxa-yaan; deeto intuu ka cabsooday ayuu is yidhi haddaad imika kalluumayso is tidhaahdo duufanka ayaa kula tagi. Markaa-suu sug is yidhi intay kala fadhiisanayqso, oo xeeligi ayuu is-ka fadhiistay. Carruurnimo ilayn waa ciil laga weynaadee, intuu misoole kalluumaysigiiba iska illaaway ayuu bacaadkii xeeliga iskaga ciyaaray. Ololaxyadii bacaadka ka buuxay ayuu jaad walba soo urursaday. Markaasuu jaad walba intii ugu qurux badnayd ka qaaday oo daldalooliyey, dabadeedna ka sa-meeyey kuul aad u qurux badan. Kuushii baa la qurux bad-naatay, deeto waxay la noqotay inuu u geeyo gabadhii abtigii. Markuu kuushii dhameeyey ee uu jeebka ku ritay, ayuum buu ambabaray oo qoraxdii eegay — waaba casar gaaban. Maalin labaadiina sidaasuu Saxardiid isaga oo aan xabbad kalluun ah soo qaban oo shabaqii oo kali ah degta ku sita ku soo noqday gurigii.

Mar allaale markay aayadii aragtay kii oo aan waxba sidin ayey gaddeedii qaare ku garaacday. Markana haddaan gabadhii abtigii ka qaban qudhaba way ka jari lahayd. Saxardiidna isaga oo wada barbararsan oo ooyaya ayuu doc ka mid ah docihii guriga fadhiistay. Gabadhii abtigii ayaa deeto u timid oo weyddiisay waxa uu dilmada ku galabsaday. Markaasuu uga sheekheyey qisadii kuusha iyo siduu maalintii oo dhan ugu lumiyey samaynteedii. kuushii intay ka qaadday ayey fiirisay. Markaasay la yaabtay samayskeedii iyo quruxdeedii. Halkii

bay u mahad naqday oo u sheekaysay kana bi'isay calooyowgii, ilaaawisayna dilmadii iyo naxariis daradii hooyadeed.

Maalintii saddexaad ayuu Saxardiid aroortii hore kacay. Shabaqii ayuu degta u ritay oo ilaa baddii ayuu waddada cagta saaray. Ilaa iyo intuu sii socdayna wuxuu ilaahay baryayey in aanu maanta fara madhnaan soo celin. Maalintaa wuxuu la kulmay cirka oo aan daruur lahayn, neecow fudud oo sidii gacan malag wajigiisa ku salaaxaysa naxariis, iyo hirar qun qun yar xeelliga ugu soo daba dhacaya. Intuu biyihii sidaa isha u mariyey ayuu wuxuu goostay in aanu maanta maryana xeeliga ku bixin, bacaadna ku dheelin, ee uu kartidiisa oo dhan iskugu geeyo siduu u kalluumaysan lahaa, bal in Ilaahayna ugu kaalmeelo siduu isaga oo wax sida ugu noqon lahaa saancadleydii qaaraaha irridda la sii fadhiday. Dabadeedna intuu bisinka qabsaday oo uu shabaqa dacaladiisii isku ururiyey ayuu biyihii dhex qaaday. Markay bixiyii ilaa gunti qabadka u gaadheen ayuu shabaqii kala fidiyey oo biyihii ku riday. Halkii buu cabbaar yar sugay. Dabadeed dacalkii uu hayey shabáqa ayuu yar gundhiyey; wuxuna dareemay shabaqii oo aad u culus. Markaasuu intuu farxay uu is yidhi: Wallee malaha weynaa kalluunka aad qabatay, ayuu shabaqa dacalkii uu hayey gacanta ka buuxsaday. Markaasuu intuu labada lugood dhidbaday uu wax alla wuxuu xoog lahaa iskugu geeyey ayuu soo dhuftay. Mise shabaqii oo googo'an ayaa gacmahiisii ku soo hadhay. Ilayn shabaquba dhagax weyn ayuu ku marmay, saxardiidna wuxuu moodayey in kalluun ka culus yahay. Waar illayn ma-siibo faro weynaa! Inankii Saxardiid baa indhaha ku dul illaaway shabaqii oo haylaamo noqday, isaga oo uurkutaallo iyo ciil dhabanka iyo gacantu isku dhageen, xusuusanna waxa ciqaab iyo dilmo sugaysa.

II

Xeelligii ayuu fadhiistay Saxardiid isaga oo murugaysan. Markaasuu shabaqii is hor dhigay oo isku dayey inuu hagaajiyo. Dabadeedna, isaga oo filaya inuu siday ahayd ka dhigo,

ayuu halkii xadhkihi shabaqa kolba laba isku geeyey uu daca-ladeedii inba in ku hagaajiye. Intuu hawshaa ku jiray ayey maalintiina ku dhamaatay. Halkii buu deeto maalintii sadde-xaadna uu isaga oo fara madhan soo hoyday.

Markay aragtay islaantii isaga oo maantana aan waxba sidin, ayey gaddeedii ku soo boodday oo intay raqabadda laacd-day ayey dhangad u nacday. Iyadoo bugta ku taysa qaylo iyo cayna muslinkii yaabay, ayuu abtigii yimid. Markuu waraystayna qaylo intay kula jeedsatay odaygii ayey ku tidhi, «Khayr laawahan yari waa mid waxba kuma fillaan ah. Araggiisana ma doonayo ee waa inuu hadda gurigayga iiga baxaa, meel an joogana aanu soo soo joogsan. Hortaydana waa in aanan ku arag ee dhulkiisa ha u kaco, meeshuu ku noolaanayo isaga yaqaan.»

Saxardiid wuxuu sugay ilaa intay dhirifkii iyo qayladii dhamaynaysay. Markay qabowday ee ay aamustay ayuu intuu abtigii Timir sidaa u eegay, isagoo deggan oo cod murugo iyo tiiraanyo le ku hadlaya, yidhi, «Abti waan kaa dambi dhaaf dal-bayaa. Waxanan kaa rajaynayaa in aanad waxba ii murugoon, iina cadhoon. Hubaal waxa ah in aan aayaday doonayn inay gurigan igu aragto. Markaa siday jeceshahay ayaan u yeelaya, oo berriba waan iska tagayaa. Ilaahay baana yaqaan si-duu iigu talinayo. Adigana abti waxan Ilaahay ka baryaya in uu kaa abaal mariyo kalgacaladii iyo xoolo ogaantii aad igu soo korisay.» Intaa markuu yidhi ayuu intuu ilmadii iska tir-tray u dhaqaaqay xaggii qolkii yaraa ee uu seexanayey.

Habeenkii oo dhan ayuu saxardiid jiifay isaga oo aan laba indhood isku gayn. Waagii markuu dilaacayna, qun yar intuu mugdigii haab haabtay, ayuu gurigii ka baxay. Gurigii ayuu ka baxay isaga oo ah mid la caydhiyey oo la eryey'. kana wa-dan mulki adduunyo waxba haba yaraatee.

Tolow, xagguu u ciirsan agoonkan yari? Muxuu yeeli? Si-duu u noolaan? Halkuu ku hoyan.? Kali ayuu noqday, aan hoy

lahayn, qaraabo ka naxda lahayn, cid kale oo aan Ilaahay ahayn, oo u kaalmaysaana aanay jirin.

Saxardiid halkii buu waddada cagta saaray isaga oo aan meel uu u socdo iyo meel uu ka socdo midna garanayn. Cadceeddii baa soo baxday, oo dadkii baa soo toosay, isaga oo nin walba halkay hawshiisu amaba muraadkiisu ahaa ku ordaya. Saxardiidse wuu socdaa, uu socdaa isaga oo aan muraad iyomeherad uu ku jeedaa midna jirin, waddo aan tuu socdo ahayn uu kasayaana jirin. Markaasay qoraxdii kululaatay oo dhidku labada dhaban ka da'ay, muruqyadiisii dhaylada ahaana daalkii korka uga soo baxay. Ma dareemo kulka, kamana cawdo dhibka iyo gaajada ee wuu socdaa, socdaa..., socdaa ilaa cadceeddii dhacday oo sharqantii yaraatay, cagtii waddada maraysayna joogsatay. Isaguse ma joogsado, gadaal ma eego, oo inuu noqdo ma doonayo, horena ma eego illayn ma yaqaan meel uu ku socdee.

Wuu socdaa, oo wuu socdaa oo habeen baaba soo galay. Markaasaa dayaxii soo baxay oo dhulkii ku fidiyey iftiinkisi. Saxardiidse kamaba war qabo in dharaari dhamaatay oo habbeenba soo hub qaata; kamana war qabo siduu waqtigu u dhaafay.

Wuxuu sidii ahaadaba, mar uum buu dareemay sidii oo ay dhawaaqyo kala duwani u yeedhayaan oo dad aan la arkayni soo daba yaacayaan, labadii lugoodna qaadiba kari la'yahay sidii waxay dhulka ku dhageen. Markaasuu istaagay oo harreerhiisii eegay oo qofna arki waayey, sharqan yarna maqli waayey. Waaba banaan cidlo ah oo aan dad iyo duunyo midna joogin, dab iyo guri midna ka dhawayn. Magaaladii iyo dadkiiba wuu ka soo jiitay, banaan isdaba yaal baanu u soo baxay. Dayaxa iyo xidigaha kor ka ifaya baana wehel ugu dhow. Sharqan la'aanta, keli ahaanta iyo habeenkan ifkii wada gaa-dhay, ayaa inankii yaraa ee Saxardiid naftiisii baqdin galisay.

Markaasuu haddana joogsaday oo isha sidaa u mariyey duunidan Ilaahay ballaadhiyey ee dhan walba u fidsan ee haddana aan juuq iyo jabaq midna lahayn. Wax yar hadduu taagan yahay ayaa wuxuu maqlay guux aad mooddo inuu ka soo dhex baxayo xasiloonaantii iyo aamusnaantii. Wallaahi, guuxaasi waa baddii, ayaa mar kali ah madaxiisii ku soo dhacday. Markaasuu ogaaday inuu baddii u dhow yahay, deeto xaggii guuxeedu ka baxayey ayuu u dhaqaaqay ilaa uu soo gaadhay xee-ligii. Mar alla markii uu bacaadkii xeeliga ee qaboobaa cagaha saarayna ee neecawdii fududayd ku dhacdayna, wax alla wixii daal iyo gaajo jidka ku soo qabsaday ayaa mar kali ah ku soo baxay: dabadeed intuu fadhiistay ayuu iskala bixiyey. Wax yari intaanay ka dambayn hurdo dheerayaaba la tagtay.

Wuxuu hurdaba oo riyaba riyo u dhiibtaba, mar kali ah ayuum buu cod weyn oo yeedhaya iyo gacan xoog weyn oo gebigiisiiba gilgilaysa ku soo ambabaray — waabase nin dheer oo cadho labadiisa indhood dab ka duulayo, labada dabnoodna gariirayaan oo dul taagan....

.... Saxardiid baa isagoo jidhkú baqdin la kurbanayo hurdadii ka soo booday. Markaasaa ninkii si kulul u yidhi, «Yaa tahay yaroowe? Maxaase halkan ku keenay? Meeshani waa meel aan qofna iman karin aniga oo aan ogayne, sideebaad ugu soo dhiirratay inaad timaado.»

Saxardiid baa ugu jawaabay, «Alla adeer, meel aan ka socio iyo meel aan u socdo midna ma garanayo. Meeshana waxay tahay war kama hayo, ee labadayda lugood ayuum baa i keenay. Muraad iyo meheradaan ku socdaana ma jiraan.» Markaasay ilmadu labada dhaban dareertay oo uu hadli kari waayey. Ninkii baa intay cadhadii ka ba'day oo qalbigiisii naxariis gashay ag fadhiiftay Saxardiid. Halkii buu deeto ka waraystay xaalkiisii. Saxardiidna intay baqdintii iyo oohintii ka ba'een ayuu uga shakeeyey ninkii dhibaatadiisii oo dhan. Markuu

dhameeyey ayuu ninkii, intuu niyadda u qaboojiyey, ku yidhi,
«Bal wax yar sii fadhi intaan kugu soo noqonayo.»

Muddo yar hadduu ka maqnaa wuxuu ku soo noqday isaga oo sida cunto iyo biyo. Dabadeedna Saxardiid buu ku yidhi, «Waxan u malaynayaa in aad gaajo la il daran tahay ee hoo cun oo cab.» Halkii buu Saxardiidna cunay cuntadii, markuu dhargayna ku yidhi, «Adeer aad baan kuugu mahadinayaa, Samaanta aad ii fashay. Waxanan jeclahay in aan kuu sha-qeeyo.» Ninkii baa yidhi, «Way wanaagsanaan lahayd sidaasi ee waxan ka baqayaa in aad igu gali kari weydo.» Saxardiid baa ugu jawaabay, «Si alla sidaad adigu jeceshabay ayaan kuula dhaqmi doonaa.» Ninkii baa yidhi, «Ta ugu horraysa ee aan kaa doonayaa waxa weeyaan in aadan hadal, waxbana i waydiin.»

Ninkii baa markaa intuu dhagax weyn oo xeeliga yaallay ku fadhiistay isha ka laliyey baddii oo eegay hirarkii iska soo daba dhacayey. Sidii waxay mowjad mowjadahan ka mid ihi u siddo fariin. Saxardiidna intuu ag fadhiistay ayuu marna isaga eegaa, marna badda eegaa isagao lo yaabban ninkan dhaqdhaqaaciisa, hiyi kacsanaantiisa iyo aamusnaantiisa. Mar alla marka uu la hadal is yidhaana, wuxuu xusuustaa balantii ay dhigteen, markaasuu iska aamusaa.

Wuxuu ninkii sidii ahaadaba oo uu mawjadaha kolba mid isha la raacaba sidii wax mid ka mid ah wax ula socdaanba, mar uumba buu sara kacay oo ku daadagay biyihii. Markaasuu intuu foorarsaday, shay yar oo mowjadu soo tuurtay qaaday. Dabadeed intuu wixii yaraa aad u fiirihey, ayuum buu mar keli ah qosol iyo farrax la boodbooday oo ninkii weynaa noqday sidii wax la sixray deeto qayliyey oo yidhi. «Caawa! waa caawa!» Saxardiid baa yaabay. Wax alla wax ninkii helay iyo wuxuu ku hadlayo midna wuu garan waayey. Ninkii baa, intuu halkuu fadhiyey ku noqday ee uu yar xasiloo

naaday, sidaa u eegay saxardiid dabadeedna ku yihi, «Caawa waa habeenkii aan sugayey. Sanad walbana mar buu habeenkan oo kale soo maraa. Markuu dayaxu soo baxo ee habeenkuna kala badh noqdo ayuuna arinku ku beegan yahay. Imikana waxa soo dhawaaday waqtigii hawsha....» Saxardiid baa madaxa lulay isaga oo in uu ku raacsan yahay tusaya, hase yeeshie aan waxba ka garanayn waxa ninku ka hadlayo.

Halkii bay haddana Saxardiid iyo ninkii fadhiyeen. Mar-kaasaa inankii Saxardiid waqtigii ku dheeraaday oo uu u ad-kaysan waayey fadhigii iyo aamuskii badnaa. Wuxuu is yidhi, si waqtiga uu u gaabiyo, dabaalo oo biyaha maaweelo ka dhigo. Hadduu maryaha iska bixi is yidhi, ayaa ninkii isaga oo dirirsan ku yidhi, «Maxaad rabtaa? Miyaad waalan tahay? Fadhiiso waryaa! Caawa oo kale badda looma dhawaadee.» Saxardiid baa isaga oo yaabban oo naxsan ag fadhiistay ninkii. Mar-kaasaa madixii yaraa wareeray oo yaabkii ka sii batay oo uu kolba is weyddiyaa «Tolow, ninkan muxuu damacsan yahay? Muxuuse doonayaa inuu sameeyo? Maxaa se u imanaya saacad-dan uu sheegayo? Waa maxayse sirta qarsoodigan ka dambay-saa?..»

Waxay halkii fadhiyaanba markuu habeenkii laba isleeg noqday, dayixiina cirka badhtankiisa marayo, baddiina soo buuxsantay oo mowjadii halkii ugu saraysay gaadhey, ayuu ninkii ku yidhi Saxardiid, «Hadday xilgii hawsha gaadhey. Markaasuu intuu dhagaxii uu ku fadhiyey ka daadegay uu dhan u yar dhaqaqay ayuu meel bacaad ku tuullaa bacaadkii ka faqay. Wuxuu kala soo baxay huudhi yar oo qof kaliya uuni dhex fadhiisan karayo. Huudhigii ayuu xeelligii dhigay. Sa-xardiid buu intuu ku jeestay ku yidhi, «Inan yohow yari i dha-gayso oo aad u maqal waxa aan ku leeyahay. Wax yar daba-deed waa habeen badhkii, waana xilligaan sugayey. Markaa waxan fuulayaa huudhigan ee haddaba markaad aragto mow-jad dheer oo mowjadaha kale ka dheer oo la moodo buur, xeel-

liga iyo dhagaxaba soo dul maraysa oo qarinaysa, waxaad yeeshaa markay mowjaddaasi dib u noqonayso, aniga iyo huudhibaba na daafadee oo na raaci, iyada ayaa i qaadi ilaa halka aan doonayee..»

«Aduuse halkaa aad joogto ayaad sii joogeysaa ilaa beri casarka. Markaasaad i arki doontaa, haddii eebbe idanka leeyahay, aniga oo soo noqday. Hadday maalintu dhamaato oo cadceeddu dhacdo oo aad anoo soo noqday i arki waydose, waxaad ogaataa in aan ahay nin laga quustay oo aan dib loo arki doonin. Taasi hadday dhacdana waxaad yeelaysaa, galbeed u jeedso, dabadeedna dhaqaaq adiga oo aan bidix iyo midig midna u leexan ilaa uu kaa hor yimaaddo guri sar ah oo buur yar dusheeda ku yaalla. Marka aad gaadho buurta hoosteeda qayli oo waxad tidhaahdaa, «Amar eebbaa dhacay oo Sugulle tag, mana soo noqon..» Intaa markaad tidhaana, irrida guriga ayaan furmaysa. Waxana soo degi doona laba nin, mid dheer iyo mid gaaban oo buuran. Adigu markaa ninka dheergooni ula yar bax oo hoos ahaan ugu sheeg waxaad aragtay oo dhan, iskana jir yaanu ka gaabani ogaan waxaad ka dheer u sheegayso..»

Mar alla markuu ninkii hadalkii dhameeyey, ayaan waxa baddi ka soo kacday mowjad dheer oo aad buur mooddo. Hadduu ninkii mowjaddii arkay wuxuu dhex fadhiistay huudhigii oo labada gacmood labada dacal ku kala qabsaday. Saxardiidse intuu labada lugood dhulka ku adkastay ayuu huudhigii xagga dambe qabtay oo isku diyaariyey inuu mowjadda raaciyo. Markay mowjaddii noqotayna dabada ayuu ka daafadeeyey ninkii iyo huudhigiibaa. Dabadeedna wuu sii eegay — waaba huudhigii yaraa oo kolna cirka maraya kolna hoos tagaya, kolna janjeedhsamaya, kolna qumaati u joogsanaya ilaa uu ka qarsoomay.

Saxardiid baa dabadeed dhagaxii dul fadhiistay oo labada indhood baddan la yaabka leh ee hirarku isdhirpaaxayaan,

ka dul laliyey, isaga oo ka fikiraya ninkii Sugule ee mowjadda raacay, meel alla meel ay gaysayna aanu garanayn. Inuu soo noqdo, in baddu liqi oo ay salkeega ku aasi oo bahaluhu curi. Ilaahay uuni og yahay.

Ilayn habeen aanad waxba qabanayn oo aad meel uun fadhidaa dheeraa. Habeenkii baa wuxuu isdaba jiitamaba dhamaaday. Cadceeddii arooryo aya fallaadhaheedii gees walba u soo gantay, ka dibna fudh soo tidhi oo dhulkii iyo cirkiiiba iftiinkeedii wada gaadhsisay, Saxardiidna halkii buu sidii qori qotonsan yahay. Cadceeddii baa waddadeedii cagta soo saartay ilaa ay cirkii laba isleeg ka dhigtag oo wax alla wixii kul iyo uumi ay haysay ifka ku soo daysay. Illayn geed la hadhsadaana — meeshuba waa cidla, casaartay iyo bannaan isku baxay. Haddana galbeed bay u dhaadhaday oo galin dambe aye noqotay. Saxardiidna hadda kolba kolka dambaysa ayuu sii hiyi kacaa oo badda isha la sii raacaan. Casar gaaban hadday gaadhayse, cadceediina godka wax yar u jirto ayuu Saxardiid xaqiisaday inay gaadhay xilligii ay Sugule ballameen. Markaasuu dhagaxii isku dul taagay oo isha mariyey mowjadaha shishadooda, isagoo isle: Tolow goormuu Sugule soo bildhaami oo uu soo muuqan.

Halkii buu haddana cabbaar dhagaxii ku dul taagnaa — ilaa cadceeddii dhacday oo mowjaddii casar xasiloonaatay, dhulkiina soo madoobaaday. Sugulase aanu wali, waaba soo noqodee, soona bildhaamin. Saxardiid baa dabadeed talo ku caddaatay oo niyaddii ka xumaatay, una murugooday nasiib darradaa ku dhacday saaxiibkii. Markan intuu sidaa u sii eegay ayuu quus iyo qalbi xumaan, ku yidhi, «Sidaasuu Sugule ku tegay soona noqon maayo.» Deeto sidii ballantu ahayd, intuu galbeed u jeestay ayuu xaggii guriga u soo dhaqaqaqay. Wuxuu socdaba waxa ka soo hor baxay buurtii gurigu ka dul dhisnaa — Markuu halkii soo gaadhay ayuu sidii Sugule ku soo dardaaray ugu dhawaaqay isaga oo cod murugaysan ku

yeedhaya, «Amar Eebbaa dhacay oo Sugule tag, mana soo noqon.»

Intaanay yeedhiidiiba gu'in ayaa irriddii furantay. Waxa soo joogsaday laba nin, oo sidii Sugule ku tilmaamay, midna dheer yahay ka kalena gaaban yahay oo buuran yahay. Labadii nin baa intay xadhig soo laalaadsadeen dhulkii u soo degay, dabadeedna ku soo yaacay Saxardiid. Isna markiiba intuu kii dheeraa gooni ula dhaqaaqay ayuu warkii oo dhan u dhiibay. Ninkii dheeraa markuu sheekadii maqlay ayaa wa-jigiisii madoobaaday oo ilmo ku soo joog joogsatay, markaasuu cod maroora-dilaac ah ku yidhi, «Ilaahay baa idmay. Sidaasaanu walaalkay ku tegay soona noqon maayo — Allaah; xoolo jacayl baa ninkeedii dishay.»

Dabadeed intuu sidaa u eegay Saxardiid ayuu ku yidhi, «khayr Allaha ku siiyo adeer — ballantii si fiican baad uga soo »axday.» Markaasuu intuu jeebka gacanta galiyey uu ka soo saaray waslad dahab ah oo u dhiibay Saxardiid oo ku yidhi, «U qaado adeer, abaal-marin, caawana annaga ayaad noo hoyan doontaa. Halkan annu deggan nahay iyo meesha dad ugu dhawo waxa u dhixeyya jid dheer oo halis ah, markaa waxan kaaga baqayaa in, haddaad caawa guuraysid aad lunto ama bahal ku cuno.» Halkii bay xadhiggii fuu'een oo gurigii ga-leen. Markaasuu ninkii u keenay Saxardiid cunto iyo caano, dabadeedna seexiyey meel fiican.

Subaxnimadii dambe ayuu ninkii dheeraa toosiyeey Saxardiid. Markaasuu qoreec u keenay oo ugu dul sheekeeyey intuu cunayey. Markuu Saxardiid qoreecdii dhamaystay, ayuu ku yidhi, «Xaggee baad wiil yohow, haddaba, doonaysaa inaad u kacco? aan waddada kuu tilmaamee.» Saxardiid baa wuxuu ku hadlo garan waayey oo talo ku soo koobantay. Mar kaliya ayuum bay madaxiisa ku soo noqotay keli ahaantiisii iyo ciirsi la'aantiisii. Markaasay ilmo isa soo buuxisay indhaha oo ha-

dalba ka soo bixi waayey. Ninkii baa intuu madaxa u salaaxay oo raxmad iyo kalgacalo u muujiyey ku yidhi, «Maxaa kugu dhacay, adeer?» Saxardiid intay ilmadii labada dhaban da-reertay ayuu cod ciijisan ku yidhi, «Adeer, anigu meel alla meel aan tago garan maayo. Qoys iyo qaraabo aan ku hagaagana ma jiraan.» Ninkii baa hadalkii inankii yaraa damqay, daba-deedna ka waraystay qisadiisu waxay ahayd. Markuu xaalkiisii dabo iyo dacal ogaadayna, intuu qalbigiisii debcay ayuu ku yidhi, «Adeer, haddaad jeceshahay in aad annaga nala joog-to, nala joog. Hase yeeshay, waxan kugula dardaarmayaa in aanad qofna wax weyddiin, waxbana tooyan; wax alla wixii lagu yidhaana ku dhaqaaqdo oo aanad hadal ka soo celin.» Saxardiid baa ugu jawabay, «Ilaahay idankii waxan noqon doonaa kaaliye habboon oo aamin ah.»

VI

Saxardiid baa gurigii, cidlada kelidii ka taagna, iskaga noolaaday. Qol yar oo guriga xaggiisa dambe ku yaalla ayaana ninkii siiyey. Qolkaasuu dabadeed habeenkii seexdaa, maalintiina marka aanu wax hawl ah qabanayn ku nastaa. inta badana hawsha loo diraa waabay yarayd. Ninkii dheeraa ayuum baana wax u yar dir diran jiray, markaasina waxay ahayd hawl fudud oo aan waqtii badan qaadan. Guriga intissa kalana waxba kamuu ogayn. Hase yeeshay wuxuu ogaaday in ninka dheer iyo walaalkii maahee qof kalena kula noolaa meesha. Sababta oo ah marka uu habeenkii daaqadaha qolalka kale uu eego wuxuu arki jiray saddex hadh oo dhaqdha-qadaya.

Ninka dheeri marka uu muddo joogaba mar buu socdaali jiray. Ka dib markuu dhowr maalmood maqnaado wuxuu soo noqon jiray isaga oo wax la cuno iyo wax la cabi iyo dhar sida. Wuxaanu ula ekaa Saxardiid nin sida maalqabeenka u nool oo haba yaraatee faakidaysi iyo badhaadhe aan waxba uga dhinayn.

Halkir bay bilba bil daba martay oo xagaagii dhamaaday, jillaalkii baa ku xigay, haddana gu'gii baa ka daba yimid — ilaa xagaagii soo wareegay oo sanadba dhamaad ku dhawaaday. Haddaba habeen habeennadii xagaaga ka mid ah oo dayaxu soo jeedo ayuum buu ninkii dheeraa u yimid Saxardiid dabadeedna ku yidhi, «Maxaad ka qabtaa, adeer, haddaynu caawa tamashle yar u baxno, habeenkan caddada ah ee quruxda badan.» Sidii buu oggolaaday inankii Saxardiid. Markaasay banaankii cidlada ahaa u baxeen iyaga oo labadooda oo kaliya ah, dayaxuna kor ka dalaalimaynayo, hareerahoodana is ballaadiyey bacaad isdabayaal, dabayshuna dhegahooda ka foodhyayo. Waxay socdaalkii tamashlada ahaa baxaa degaanba, waxay maqleen guuxii badda. Markaasay xaggii xeeligi u baydheen ilaa ay soo gaadheen, oo ay arkeen dhagaagii weynaa ee yaallay, dabadeedna dhagaxii ayey iska fadhiis-teen iyaga oo ku nasanaya:

Waqtigaa baddu way kacsanayd, waxayna lahayd hirar isdhirbaaxaya oo la moodo inay dirirayaan, hase yeeshoo guuxa badweynata ka soo yeedhaya iyo neecawda saxan saxda leh ee ka soo kacaysaaba, marka lagu daro dayaxa shan iyo toba-naadka ah ee ifkiisu arlada wada dhameeyey, waxay qofka ku chalinayeen xasiloonaan iyo nasasho. Aragtidaa guud iyo astaantaa u habeenkaa adduunku lahaa waxay Saxardiid xu-suusisay, habeenba habeen ka tilmaan lehe, habeenkii ninkii Sugule ugu dambaysay. Habeenkaas oo sanad ka soo wareegay markay isaga iyo Sugule dhagaxan ku wada fadhiyeeen. Sugule — ninkii wanaagsanaa, ee mawjadda raacay, isaga iyo arinihiisa la yaabka lahaa. Habeenkaa dabadeedna, sheeko iyo shaahid wax sheegaya aan lana arag lana maqal.

Saxardiid iyo ninkii ayaa cabbaar halkii wada fadhiyey isaga oo mid walba geestiisa iskula maqan yahay. Woxoogaa markii aamuskii ku yar dheeraaday ayuu ninkii isaga oo cod murugsan ku hadlaya ku yidhi Saxardiid, Wil yahaw yari, caawa waa habeenkii xagaaga kala badhayey waana habeen-

kaan sugayey ee aan sanad dhan tirsanayey. Waxa weeyaan in aad xusuusan tahay mooyaane habeenkii walaalkay tegay dabadeedna soo noqon. Walaalkay oo xusuustiisu aanay habeen iyo dharaar midna madaxaya ka bixin, dartiina aanay biyo iyo baad midna ii dhadhamin, jiif iyo joog midnaba naftaydi u diiday. Markaa, hadda, waxaan ku goostay in aan ka daba tago oo aan raadkiisii maro. Amba waan heli oo aan guulaysan, amba siduu u tegay, soo noqod la'aan, ayaan u tegi.» Deetoo intuu wax yar aamusnaa ayuu haddana raaciyeey, «Haddaba markuu habeenku laba noqdo ee xilligaan sugayo ay gaadho, ee mawjadda aad garansaa timaaddo, waxan fuulayaa huudhi yar oo halkaa hadda ku aasan. Waxed yeeshaa: markaa intaad si fiican diyaar u noqoto, aniga iyo huudhigaba na daafadee oo na raaci mawjadda. Berri casarka markay tahay, haddaan soo noqon waayo, sidaadii gurigii tag oo intaad buurtii is hoos taagto, waxad tidhaahdaa, «Amar Eebbe ayaa dhacay. Ayaanle teg, sidii Sugule u tegay, mana soo noqon.»

Intaa markuu maqlay ayaa inankii Saxardiid wadnuhu is-garaacay oo baqdin iyo qalaanqal galeen. Markaasuu is yidhi afka kala qaad oo hadal. Intaanu waxba odhanse, ninkii oo cadhaysan baa ku qayliyey, kuye, «hus! miyeynaan ku ballamin in aanad waxbana i weydiin waxbana isku kay hortaagin.» Saxardiid baa intuu madaxa lulay iska foorarsaday. Ninkiise intuu kacay ayuu bacaad halkan ah oo tuulan faqay deeto ka soo saaray huudhi yar oo qof deeqa. Markaasuu intuu huudhigii xeelliga dhigay, uu dhex fadhiistay, u digtoonaaday socdaalkiisii lama yaqaanka ahaa. Wax yar ka dibna mawjad-dii la sugayey ayaa soo dhacday. Inankii Saxardiid baa isna misoole huudhigii dacalka cuskaday, markay mawjaddii noqo is tidhina, ninkii iyo huudhigiiba wuu ka daba daafadeeyey. Cabbaar baanu dabadeed sii fiiriyeey ilaa ninkii iyo huudhigiiba ka qarsoomeen.

Isna halkii buu habeenkii ugu dhamaaday, maalinimadii dambana ugu xigtay. Markaasaa isaga oo sidii u fadhiya dha-

gaxii, oo sugaya Ayaanle ayaa casarkii ballantu ahayd gaa-dhay. Hase yeeshi intay cadceeddii dhacday oo dhulkii madaabiiday ayaan Ayaanlana waaba soq noqode soona muuqan, soona bildhaamin. Saxardiid deeto intuu quus kaga soo degay dhagaxii ayuu cagajiid iyo murugo ugu soo kacay xaggii guriga. Markuu buurta hoosteedii gaadhyyna, isaga oo cod dir-qi ku soo baxaya ku hadlaya ayuu yidhi, «Amar Eebbe ayaa dhacay. Ayaanlana teg siduu Sugule u tegay mana soo noqon.»

Markaasay irridii gurigu furantay oo waxa soo daadagay ninkii gaabnaa ee buurnaa oo hiyi kacsan, uur xumina wajigii-sa ku taalo. Hadduu warkii maqlayna, intay ilmo kululi ka soo boodday, ayuu, isaga oo laabtiisa uur-ku-taalo ka karayso, yidhi, «Waa amar alla... Xoolo jacayl baa' ninkeedii dishay.» Dabadeed intuu wax yar aamusay, ayuu raaciyeey, «Ilaahay wuxuu qoray nina ka baxsan maayo. Haddiise mawdku igu simo oo aan ilaa kal dambe noolaado, hubaal inaan walaalladay ka daba tagayo. Amba waan soo nabad noqon, amba sidaa ay u tageen ee looga quustay uum baan u tagi oo la iiga quusan!»

Saxardiid baa deeto hadal is yidhi, «Adeer...» Ninkii baa-se ku qayliyey, «Aamus! haddii kale orod meeshaad doonto tag.» Saxardiid intuu madaxa lulay ayuu foorarsaday isaga oo murugo iyo tiiraanyo garbihii yar yaraa isku roogmadeen.

VII

Markii haddana sanad kale dhamaaday ee ay xagaagii kale badhtankiisii gaadhyay ayaan ninkii saddexaad isna intuu Saxardiid kaxaystay isku sii daayey xaggii badda. Habeen badhkii hadday tahayna intuu isna huudhi yar fuulay, ayuu Saxardiid ku yidhi «Waan tagayaa siday walaalahay u tageen. Markaa haddean soo noqon waayo berri casarka — waa Ilaahay amarkii oo siday Sugule iyo Ayaanle u tageen ayuu samaalena u tegay.» Dabadeedna intuu dhex fadhiistay huudhigii ayuu diyaar noqday. Markay mawjadii timidna Saxardiid baa misoole ka daba daafadeeyey. Halkii baanu ku sugay isaga oo

uur xumaan iyo caloolyo la foorara, Ilaahayna baryaya inuu soo nabad celiyo saaxiibkii. Hase yeeshi, naslib-darro ayaa dhacday oo markay casarnimadii dambe gaadhyay ayuu soo noqon waayey Samaale.

Wiilkii yaraa ee Saxardiid ayaa dabadeed warwarkii iyo walaacii ka batay. Markaasuu wax alla wax uu yeelo iyo meel alla meel uu u dhaqaaoqo garan waayey. Mar kali ah uum bay keli ahaantii iyo cidladii ku soo baxeen. Saddexdi walaalaha ahaa iyo arrintoodii la yaabka lahaydina tege. Male la'aan iyo meherad la'aan ayaa Saxardiid xaalkiisii noqday. Halkii buu deeto isaga oo cagaha jiidaya xaggii guriga u soo kacay. Markuu buurtii hoosteedii yimidna, ku dhawaaqay cod tiiraanyo iyo niyad xumaan la googo'an, yidhina, «Aah! Wayii! waa Ilaahay amarkii oo samaale wuu tegay siday Sugule iyo Ayaanle u tegeen, mana soo noqonn.» Markuu yeedhiddii dhameeyeyna irridii ayaa furantay waxana isa soo taagtay habar gabow iyo taag-darri la kurbanaysa. Habartii baa intay irridii cuskatay ee ay hoos soo qooraansiday anfariir la qaylisay, «Maxaad tidhi! Maxaad tidhi! ma Samaalaa tegay!» Intaa markay tidhi ayey sidii wax isa soo tuuraya noqotay. Saxardiidna wuxuu gartay inay saddexdiin ee walaalaha ahaa hooyadood tahay. Markaasuu intuu ka baqay inay soo dhacdo ku yidhi, «Waxba ha nixin, hooyo, oo aan kuu waramee xadhig ii soo laalaadi.» Deeto xadhiggii ayey u soo laalaadisay oo uu gurigii ku fuulay. Markaasuu intuu habartii gacanta qabtay oo uu meel fadhiisiyey ayuu sheekadii horayso iyo dampaysoba dabada u galay; iyana intaa ay dhagaysanayso taahi, hiinfaadh iyo habatac ayey kala joojin wayday. Markii uu sheekadii dhameeyey ayey tidhi, «Hiih! Ilaahay iyo awliyadaa jira — Alla! miyaannu kuwa dhoof u baahanba ahayn.... alla! waa xoolo jacayl. Alla! maxaan u digay oo ay digniintii dhego u yeelan waayeen. Alla, maxaan waaniyey oo ay waantoobi waayeen.» Halkii bay calaacal iyo baroor kala joojin wayday. «Wayii! Hoogay! caawaan goblamay. Alla! inamadaydiyo! siday idiinla noqotay hooyadiin cidlo, ka taga, wayii! wayii...» Markaasay geb tidhi oy mi-

yir beeshay. Saxardiidna halkii buu biyo ku rusheeyey ilaa ay haddana soo miyiraysatay, deetana intuu ag fadhiistay ayuu u sheekeeyey oo maaweeliyey, iskuna dayey inuu qalbigeega ku beero waawaan iyo saadaal ah inay inamadeedii soo noqona-yaan. Markaasay tidhi, «Ayaankee.» Deetana intay wax yar aamusnayd ayey tidhi, «Hooyo, bal ma ii raaci badda agteeda halkii ay ka amba baxeen, naftu ha ku soo quusatee?» Saxardiidna hadal la'aan ayuu kacay, dabadeedna intuu buurtii ka daadejiyey ayuu sii tukubiyey ilaa badda xeeligeedii.

VIII

Markay dhagaxii badda ag yaallay gaadheen ayey habartii dhagaxii ku fadhiisatay saxardiidna isaga oo wali u sheeknaya, kana bi'inaya uur-xumaan iyo murugada, ag fadhiistay. Habartii baa dabadeed markay nafteedii yar qabowday ee ay kala nafistay ayey u bilowday sheekadii saddexdii inan ee socdaalka lama yaqaanka ah tegay. Waxay tidhi, «Inamadayda aabbahood ayaa bad mireen ahaa. Waxanu ka shadayda aabbahood ayaa bad mireen ahaa. Waxanu ka shaqayn jiray dahabka. Muddo dabadeedna wuxuu noqday maal qabeen weyn. Noloshayadii markaa waxay noqotay mid barwaaqo iyo badhaadhe ku dhisan. Hase yeeshi meel alla meel uu ka keeno dahabka uu ka taajiray cidi ma aqoon.

Waxaase jirtay in sanad walba habeerika xagaaga kala badha in uu isku diyaarin jiray safar halka u yahay aan jaogayn. Maqnaashihisuna wuxuu ahaan jiray maalin ama maa-lin badhkeed. Waxanu soo noqon jiray isaga oo kiish weyn oo dahab ah sida. Dahabkaas ayuu dabadeed soo iibin jiray, noogana keeni jiray wixii aannu u baahanahay oo dhan, inta soo hadhana guriga dhigi jiray. Haddaba, inkasta oo aannu si walba u baahi baxnay oo aannu badhaadhe iyo dhereg meelsare ka gaadhnay, sanadna kama uu joogin socdaalkaa Isla mar ahaantaa, ruux bini'aadami ah oo xogtiisa ogaana ma jirin. Markiise tiisii gaadhay ee geeridii ku soo dhawaatay, ayuu aniga sirtiisii iiga warramay. Wuxuu markaa ji sheegay in méesha uu sanad walba u safri jiray ee uu kiishka da-

habka ah ka keeni jiray, tahay meel fog oo aan jid loo maro oo tilmaamanba lahayn, dooni tagtaana jirin. Isaguse uu israacin jiray, intuu huudhi yar oo isaga uun leeg u fuulo, mawjad weyn oo sanadkiiba habeenka xagaaga badha timaada. Mawjaddaasi ayaa u qaadi jirtay xeeb fog oo waxa dahab yaalla ilina arag, dhegana maqal. Halkaasuu kiishku wuxuu dahab uu soo qaadi karo ku soo qaadan jiray, dabadeedna maa-linnimada dambe soo raaci jiray mawjadda. Waxana khasab ku ahayd oo uu aad u ilaalin jiray in uu sanad walba waqtigaa go'an diyaar ku noqdo badda xeelligeeda. Haddii waqtigaa xagaagu kala badh noqdo, habeenkaa dayaxa le ee badduna soo buuxsanto u dhaafana, waxay u ahayd waqtii qiima le oo ka lumay. Wuxaanu sugi jiray ilaa sanadka xiga, goorta goorteeda.

Haddaba, hoogayga iyo ba'ayga, hooyo, maxaa sirtaa i ogaysiiyey? Maxaansee, han ogaadee, inamadayda ugu sheegay! Sheekadaa markaan u sheegay ayaa hiyi kac iyo qalaan qal ugu horaysay. Anaa uurkooda ku beeray xoola jacaylka. Alla! sow dahab iyo lacagba nooma buuxaan — miyaannu baahiba u qabnaa. Siduu mid walba u lahaa sidii aabbahaa oo kale noqo, waanigaa anna ku inama waayey ee ku goblamay. Waa kuwaan anigana cidlada, qareen iyo ciirsi la'aanta igaga tagay.» Hadalkaa dheer ee cataabka iyo calaacalka ku go'an markay dhamaysay ayey intay labada gacmood wejiga iska saartay, oyday oohn jidhiidhico le oo naf bax ah. Saxardiid baa oohn-tii intay si xun u damaqday qalbiga u qaboojiyey oo kolba wax uga sheekeeyey, «Hooyo iska aamus, waxbana naftaada cidhiddhi ha galinin. Aniga ayaa, haddii Alla yidhaa, halkii inamadaadii kuu gali. Iguna kalsoonow waxba kaa hagran maa-yo kartiday — Ilaahayna waxan ka rajaynayaa inuu inamadaadii inoo soo nabad celiyo.» Habartii ayaa intay madaxa lushay tidhi, «Ayaankee, hooyo ayaankee.... oo ma rajo iyo waawaan kale ayaa soo noqodkooda laga qabaa?» Saxardiid

baa ugu jawaabay, «Ha ka quisan hooyo raxmada Ilaahay lagama quustee. Anaana ballan kuugū qaaday in aanan waxba iska hagran wax alla waxaad iiga baahato. Kal dambe haddii Alla yidhaana waxan ku talo jiraa inaan halkay mireen maro oo aan walaalahay raadiyo. Ilaahay idankiina waxan sahadsanaya in aanu anaga oo wada nabad qabna kugu soo noqon.» Islaantii ayaa intay yar ilka caddaysay tidhi, «Hoogayga ayaankee taasi waa saadaal fog.»

IX

Sanad dhan ayuu hadana Saxardiid gurigii bahartii la joogay. Halkii buu u adeegaa oo wax alla waxa ay u baahato u qabtaa; cunto hadday tahay, cabbid, maawelo, sheeko iyo wehelnimo. Muddo markuu joogaba marbuu waslad ama laba dahab ah qaadaa oo magaalada ka soo iibiyaa, dabadeedna lacagta ku soo gadaa wixii ay kolba isaga iyo habartu u bahan yihiin, sidaasuu markaa duqdii u dar yeelay ilaa sanadkii dhamaaday

Markuu haddana sanadkii dhamaaday ee habeenkii la yaabka lahaa gaadhad ayuu inankii Saxardiid qal qaalsaday wiixii uu u baahnaan lahaa socdaalkii badda. Deeto intuu wixii looxaan iyo masaabiir gurigii uu ka heli karayey soo urursaday ayuu ka sameeyey huudhi yar oo isaga le'eg. Wuxuu kale oo uu soo qaataay qarbad uu neef ka buuxiyey oo uu afka ka xidhay iyo labo sibraar oo yar yar oo midna uu woxoogaa cunta ku riitay midna biyo ku shubtay. Markuu isyidhi xilligii mawjad da amrani imanaysay ayeyy gaadhayna, intuu ka ducaystay habartii oo uu alaabtii qaataay ayuu isku sii daayey xaggii badda.

Markuu Xeelligii yimid ayuu, dabadeed, si fiican u diyaargaroobay. Ugu horaystii intuu maryihii iska furay ayuu ooga-diisii oo dhan xaydh mariyey. Dabadeedna intuu qarbadkii neeftu ka buuxday laabtay ku xidhay si haddii huudhiga yar la gaddoomo aanu badda ugu hafran, labadii sibraar ee yar ya-

raana dhabarka ku xidhay; ayuu huudhigii, oo dacalna biyaha kula jira dacalna ciidda, dhex fadhiistay. Xilligii gaarka ahaa ayuu deetana sugay. Ilbidhiqsi intaanu dhamaan waaba mawjaddii oo lalaysa. Ka dib markay xeelligii oo dhan wada qarisay ayey sii noqodkii Saxardiid iyo huudhigiisiiba la xawaaraysay.

Mawjaddii baa saxardiid iyo huudhigiisi yaraa mar sammawaadka gaysa, mar gabigoodaba hoosta gashata, mar isagan a hoosta marisa huudhigana dusha. Wuxuu oo bug iyo bac ah, Saxardiid huudhigii ayuum buu labada dacal ku kogay. Markaasay biyuhu indhaha ka dhirbaaxaan oo ay dhegaha ku dhuftaan. Mararka qaarkood waxabu moodaa in uu indhihi iyo dhagihiiba beelay. Dhirbaaxadii mawjadda ayaa deeto madaxii wareeray oo miyir tirtay. Markaasay intay muruqyadii yar yaraa debceen oo uu mayd oo kale noqday ayaa huudhigii uu xajisanayey farihiisa ka baxay haddaan qarbadku laabta ugu xidhnayna oo aanu la sabaynayna Saxardiid dambe lama arkeen oo bad weyn ta maqaadiirtu la soo doonatay ayaa qaaxada u ridan lahayd.

Hasa ahaatee naf Ilaahay noolaynayaa ma baxdee, isaga oo miyir la' oo biyaha waalani kolba dhankay doonaan u tuurayaan, ayuum baa mar kaliya mawjaddii in Ilaahay uuni qiyasi karo cirkaa martay, dabadeedna Saxardiid iyo qarbadkiisiiba ku tuurtay xeeb banaan oo mayd ahaan uga tagtay. Wuxuu xeebtii yaallaba oo uu miyir iyo maanba la'aadaba cadeeddi subaxnimo ayaa mudh soo tidhi. Iftiin diirran ayey markiiba ifka wada gaadhsisay. Saxardiid baa intay cadeeddi jidhkiisii yar diirisay deeto qunyar qunyar naftii ugu soo noqotay oo indhaha kala qaaday. Markuu guuxii madaxiisii ka baxay ee uu si fiican u kala gartay ayaa wuxuu isarkay inuu jiifo meel doog yar oo qoyan leh, qarbadkii iyo labadii sibraarna dhexda kaga xidhan yihiin. Kolkaasuu sara kacay oo hareerihiisa eegay. Cabbaar ayaa af kala qaad iyo yaab neefiba ka soo bixi wayday. Wuxuu arkay xeeb waxa

dahab yaalla aan bini'aadam, waaba arag iyo maqale, kuna riyoon — bal amuurutan iyo yaabkan eega — Ilaahay cilmigii-su fara badanaa!

X

Dahabkii wadhnna markpu arkay ayuu xusuustay sheekadii habartu uga sheekaysay, dabadeedna gartay in meeshan maqaadiirtu ku soo tuurtay ay tahay xeebtii dahabka. Markaasuu intuu qarbadkii meeshii kaga tagay, daawasho kolba dhan u socday. Intaanu haddaba dhowr talaababa qaadin, ayaa wuxuu maqlay cod u yeedhaya, xaggiisii markuu daymoodayna wuxu arkay nin geed cufan oo midho leh ilil biyo ahna ku dul yaalla, hoos fadhiya.

Markaasuu ku dhaqaaqay ninkii. Hadduu ninkii wejigii-sii si fiican u arkay yaab iyo fajac baa Alla u keenay. Intuu farxad is hayn kari waayey ayuu qayliyey, «Alla! waa Samaale, Adeer.» Markaasuu ku cararay is yidhi gacan qaad, hase yeeshee, Samaale ayaa halkuu fadhiyey yar ruq ruqaansaday oo kici waayey. Saxardiid baa intuu yaabay yidhi, «Maxaa kugu dhacay adeer?» Samaale ayaa intuu indhaha ka bidhiq bidhiqsiiyey yidhi, isaga oo cod murugsan ku hadlaya, «Adeer soo dhaweyn la'aan ha iga moodine waanan kici karayn. Sow intay mawjaddii dhagax weyn oo dhagaxda xeelliga ka mid ah igu dhufatay, qarqarka hoos oo dhan budusha iga may dhi-gin. Iliisha biyaha ah iyo midhahaa geedka la'aantoodna la imaba arkeen oo haraad iyo gaajo ayaaban u dhiman lahaa.» Saxardiid baa beerka u qaboojiyey oo ku yidhi, «Waa nasiib-darro, adeer, imikana Allaha kuu sahlo.»

Markaasuu deeto intuu ag fadhiistay halkii uga sheekeeheyey xaalkisiintay soo kala maqnaayeen, kana waraystay wuxuu ku sugnaa intii uu cidladan yaallay. Samaale ayaa, dabadeed yidhi, «Adeer, miyaan sanadkaa dhan ee aan soo kala maqnayn wax oon xoolaad ah afkayga galiiyey.» Saxardiid baa markaa intuu kacay is yidhi, bal saaxiibka shinbir kol ay ku

tahay wax siniina meelaha uga soo dil. Duurkii ayuu deeto kolba dhan u gudbay. Cabbaar hadduu socday ayuu arkay qiiq ka baxaya meel fog. Markaasuu xaggii qiiqu ka baxayey u ordoy — waaba nin qalwo yar oo dhagaxaan ah samaystay oo hilib yarna dab ku dubanaya. Saxardiid baa u soo qayliyey, ninkiise maba soo dayayaa xaggiisa. Markuuse u dhaawaaday ayaa ninkii soo jeestay — Saxardiid baa fajac awgii hadalba ka soo bixi waayey.

Ninkiise intuu ku soo booday oo uu isku duubay ayuu farxad la qayliyey, Kuye, «Saxardiid! waar sideed halkan u timid.» Saxardiidna, «Adeer! Ayaanle! adna ma halkanaad joogtay.» Ayaanlaase madaxa lulay sidii qofaan waxba maqlayn. Saxardiid baa ku celiyey hadalkii «Adeer maxaa ku helay, bal ii warran?» Mar labaad buu haddana ninkii mada-xa lulay; markuu in yar aamusnaa baanu yidhi, «Adeer, wal-lay iga tahay afka aad dhaqdhaqaaqinayso uun baan arkayaaye, wax alla waxaad ku hadlayso ma maqlayo. Sow habeen baaskii aan badda isa soo raaciyyey, mawjadid siday dhan wal-ba iiga dhirbaaxaysay igumay soo tuurin xeebtan anoo dhego la'aan dam ah.» Saxardiid baa isna ku yidhi, «Adeer, waa amar alla. Imikana Ilaahay dhib yaraan ha kuugu soo celiyo maqalkaagii.» Ayaanlase intuu madaxa lulay, Kuye, «Mahaad tidhi, adeer.»

Markaa naf ahaanteeda ayuu Saxardiid maqlay cod meel fog ka soo baxaya. Dabadeedna intuu farta labada dabnood saaray si uu Ayaanle u aamuso, dhegaha u yuubay xaggii codku ka yeedhayey. Wuxuu maqlay hees calaacal iyo tiiraanyo leh oo wax damqaysa. Markaasuu xaggii codku ka soo baxayey u jeestay — waaba nin dheer oo xubno toostosan oo ul is horwada, dhulkana kolba lug aayar dhigaya, sidii qof indha la, kuna heesaya luuq macaan, hase yeeshee, murugo ku ladhan tahay.

Saxardiid baa intay luuqdii meel ba'an qalbigiisa ka taabatay, istaagay oo dhegaystay. Kali ahaantan iyo go'odoonimadan

ninka ka dhawaajinaysaa xusuusisay markii u cidlo, iyo ciarsi la'aanta dalanbaabiyyey. Markaasuu ijmeeyey oo dhidid qabowi labada kilinkilo dareeray. Markuu ninkii heestii dhameeyey ayuu deeto xaggiisii u cararay. Hadduu is hartaagay oo wajigisiisi gartayna farxad baabu la qayliyey, «Alla! Adeer sugule!»

Ninkii indhaha la'aa ayaa is taagay isagoo fajacsan kuye, «Waa kuma? yaa ii yeedhaya?» Saxardiid baa Kula degdegay, «Miyaanad i garanayn, adeer?» Ninkii baa yaab wajiga la ururiyey oo yidhi, «Allaa i lehe dhawaaqaasi waa mid an garanayo!» Markaasuu intuu talaabo hore u soo qaaday oo u gacanta is hor fidiyey dabadeed wajiga taataabtay Saxardiid, yidhina, «Qofkani wajigii saxardiid buu leeyahay. oo hadaad tahayba, sideebaad u timid dhulkaan fog. ?»saxardiid baa intuu la yaabay gacan fidfidintii iyo hadalkiisii ku yidhi, «Haa adeer saxardiid baan ahay. Maxaase kugu dhacay? miyaanad i arkayn?» Sugule intuu madax lulay isaga oo ay niyad jab iyo uur xumaani ka yidhi, «Alla, adeer, haddaan wax arkayo miyaan kuba garan waayi lahaa. Habeenkii ayaan-darrada siday ee aan mawjadda isku soo madalufiyey, ayaa dhirbaaxadii biyihii waallaa labada indhoodba iga rideen. Markaan baddii ka soo baxayna xeebtan cidlada ah ayaan u soo baxay aniga oo dem ah..» Saxardiid baa isna u beer diiriyey oo ku yidhi, «Ilaahay wax roon ha kaaga abaal-mariyo dhibka ku gaadhay, waxaanan ka barayaa inuu dhakhsu kuugu soo celiyo wax aragaagii.» Ninkii baa yidhi, «Adeer iga daa hadalkaasoo, waxad iiga warantaa sidaad walaallahay iyo hooyaday kaga timid,» Saxardiid baa intuu qoslay yidhi, «Walaalahaa halkan aan joogno ayey imikadan innala joogaan.»

Sugulaa, intuu ku-soo-booddo ku noqday hadalkii wiilka yari, afka kala qaaday, kuye, «Halkan? dhulkaan? Waar ma-xaad leedahay?» Saxardiid baa ugu jawaabay, «Haa, adeer. kala raaggii iyo kala maqnaashihii dabadiina, nooli kulunay.» Halkii buu soo hagay, iyaga oo midba ka kale uga sheekaynayo wuxuu la kulmay intay kala maqnaayeen, ilaa meeshii Ayaan-

le joogay. Mar alla markii labadii walaalaha ahaa isku soo dhawaadeen, intay isku soo boodeen ayey xiise kulul iyo kalgacalo aan la koobi karayn isku dhundhunkadeen, midbana midka kale ku dul ooyey. Way isa soo wada raaceen oo markaa waxay yimaadeen meeshii Samaale ku sugayey Saxardiid. Waana muuq iyo mayaad aan marnaba la tilmaami karayn, markay saddexdii nin ee walaalaha ahaa kulmeen. Iswaydaarsi erayo, kalgacalo iyo beer diiranaan iyo Eebbe-ku-mahadin ururkoogii — ayuum baana xaalkoodii noqday.

XI

Intii ay Saxardiid iyo Saaxiibadii la wareersanaayeen baddhaadhihi iyo farxad kulunkoodii lama lifaanka ahayd ayaa dharaarتا bädideedii dhamaatay. Markaa sidaan filayno maw-jaddii amranaydna xilligeedii wuu tagay. Sanad ka dib goor ka horaysa inay dhulkoodii ku noqon karaana waxay noqotay waxaan suura gal ahayn. Sidaasina waxay ku dhalisay nimaqkii murugo iyo calaacal ay farta dhex-da uga qaniineen waqtigaa habboon ee ka lumay. Waxay ka fikireen hooyadoodii gabowday ee sugaysay soo noqto. Saxardiid. Hooyadood oo markaa ay uga cabsi qabeen marka kuu Saxardiid ku soo noqon waayo. ay mooddo in isna sidii saddexdii inan sooba noqon, waayo. Markaana, inta muraayaddu wax noqoto, marooradillaacba laba dhimato. Markay saddexdii walaalaha ahaa cil la wada foorarsadeen ee midna eray ka soo bixi waayey, ayuu Saxardiid yidhi, «Ilaahay waxan baryey inuu iyadana sii daryeelo, inagana nabad qab innagu celiyo. Markaa waxba ha is ciilkaambiyina ee inna keena aan ku dhaqaaqno sidii aan ugu noolaan lahayn sanadka innaru soo socda xeebahan maqaadiirtu inna keentay.»

Markiiba, deeto, waxa israacay isaga iyo Ayaanle, Indhoolihii Sugule iyo Curyaankii Samaalana halkii bay kaga tageen. Markaasay duurkii ugaadhsu u dhex qaadeen. Waxay kolba bakayle iyo sakaro ka nixiyaanba ugu dambaystii ayey soo

dileen deero weyn oo shilis. Halkii bay ku soo noqdeen, da-badeedna sameeyeen casho wanaagsan. Markay dhergeena waxay ku kaceen aqal dhis. Geedihii agtooda ayey kolkiiba laamo ka soo googooyeen, kana dhiseen waab fiican. Maalintii dambena intay waxay dahab qaadan karayeen urursadeen ayey soq ugaadhsadeen saddex biciid oo waaweyn. Markaasay saamahoodii ka samaysteen kiishash ay dahabka ku gurtaan iyo qarbadoo ay laabta ku xidhaan markay badda marayaan. Wuxuu kale oo ay intii dambe oo dhan ku hawshoodeen inay sa-meeyaan huudhi weyn oo afartoodaba qaada. Markay sidaa wixii tabaabusha iyo diyaarin ahaa u dhamaysteen ayey deeto iska nasteen oo dhowreen waqtigii ay socdaali karayeen.

Sanadkii baa markaa sidiisii caadiga ahayd xilliba xillika daba wareegay. Xagaagii baa dhamaaday oo dayrtii baa ku xigtay, markaasaa jiilaalkii soo galay — dabadeedna gu'gii, ilaa ay xagaagii dambe iyo goortii la sugayey soo dhaceen. Markay maalintii ay tirsanayeen iskeentay ayey huudhigii badda agteedii dhigeen. Saxardiid iyo Ayaanlena labadii kale ee laxaadka la'aa ayey tukubiyeen ilaa halkii huudhiga ay dhi-geen. Habeenimadii hadday gaadhay ayaa afartoodii, nin walba labada dhegood iyo labada indhood maro iskaga xidhay, nin walbana kiish dahab ahna dhabarka ayuu ku xidhay, qarbadkiina laabta ku xidhay. Mawjaddii kolkay meel fog soo xiinta'y ayaa, deeto, intay huudhigii baddii dhex dhigeen ee ay wada fuuleen ayey sugeen intay soo gaadhaysay.

Wax yar ka dibna — waaba iyadii oo lalaysa. Kolkiiba xeelligii ayey darif ilaa darif dul martay; sii noqodkiina, saa-xiibadeen iyo huudhigoodii ayey la sabbaysay. Waxay marna kor u tuurto, marna hoos u celiso oo sidii kubadda ugu ciyarta-ba, habeenkii iyo dharaartit dambe oo dhan bay sidatay. Casar gaaban hadday tahay ayey iyaga oo nabad qaba ku soo tuurtay dhagaxii weynaa ee ay afartooduba ka amba baxeen.

Sugule ayaa ugu horreeyey nin maradii indhaha iska fura. Mar alla markuu uu iska furay ayaa buu farxad la qayliyey,

«Alla! alla! wax baan arkaya. Kani waa dhagaxii, xeelligii oo dhamina waa kaa; waataa waddadii gurigeena loo marayey.» Ayaanlena isla markaasuu maradii dhegaha iska furay, kuye, «Maxaad tidhi walaal? malaha waaban ku maqlayaa! Alla! cawadayda iyo badhaadhahayga; ka dilaac dhegahayga dabool-kii ku dahaadhnaa!» Intaan Ayaanleba qayladii joojin, waa-ba Samaalaa intuu qarbadkii iyo kiishkii iska dhigay, xagoodii u soo dhutinaya, «Waxan u malaynayaa in aan socon karayo! wallee, dabarkii laga fur lugahaygii.»

Saddexdoodii markuu mid walba ka soo noqday yaabkii iyo farxaddii ayaa Saxardiid yidhi, «Ilaahay baan ku mahadinayaa faya qabkiinaa idin soo noqday. Wax la hubo ayaanay ahayd in Ilaahay aqbalayo duqdii idin hooyada ahayd ducadeed.» Afartoodiibaa dabadeed xaggii guriga ayey u soo kaceen. Markay buurtii hoos yimaadeen ayey mar kaliya u wada yeedheen hooyadood. Intaan dhawaaqoogiiba go'inna irriddii baa furantay oo habartii baa soo joogsatay — ilaa midba mid uga bed-iyey xaggeegii.

Habartii ayaa farxad awgeed waallan gaadhay. Niman-kiina farxad taa ka sii weyn ayey ku farxeen aragtida hooya-dood oo nabad qabta ay ku soo noqdeen. Saxardiidna waxay ugu mahad naqeem geesinnimadii iyo daacadnimadiisii. Isna farxad iyo guul ayey u noqotay isku soo ururkoogan ka dam-beeyey dhibaataadii iyo kala lunkii.

Hasa yeeshay, farxadii iyo damaashaadkii may madax mar-in Saxardiid ee markaas ayuu xusuustay abtigii Timir oo uu ka soo tegay muddo dhowr sanadood horteed, taa iyo goortiina war iyo wacaal aanu u hayn. Waxa ku dhashay qalbiisii markaa xiise iyo hilow, dabadeedna saaxiibadii buu ku yidhi, «Mar hadday saadaasheenii rumowday, niyaddiina innoo fadhiisatay oo aynu faya qab iyo nabad galyo iskugu wada nimid, waxan idin weydiisanayaa in aad ii oggolaataan inaan u tago abtigay oon u tagidiisa iyo aragiisa aad u jecelahay una xiiso qabo.»

Saddexdii walaalaha ahaa iyo hooyadood ayaa ku soo wada booday oo isku duubay Saxardiid markuu sidaa yidhi, kuna dhaartay oo yidhi, «Wax waliba naga xaaraan in aanad wali-gaa naga tegeyn. Guushayada iyo badhaadhahayagaba adaa u sabab ah.» Wuxuu ugu jawaabay «Marnaba naftaydu imasiinayso inaan idinka tago. Waxase jirta in aan abtigay la-hayn inan kale. Markaa waxan ka yaabaya in uu haddaa, wuxuu iiga baahdo.» Waxay ku yidhaahdeen, «Hadday si-daasi jirto waaba lagama maarmaan inaad tagto, waxaadse nooga ballan qaadaa inaad nagu soo noqon doonto.» Isna wuxuu ku yidhi «Hubaal in aan idiin imanayo, mar allaale marka-waqtigu ii oggolaado. Ugu yaraana waa in aan sanadkii laga goor idin soo booqdaa.» Markaasay iyana u raaciyeen, «Kollay haddaanay taa ka fursanayn, xusuusnow waa inaad imaantin-kaaga ku soo beegtaa habeenka xagaaga kala badha sanad wal-ba.»

Saxardiid baa intuu kiishkiisii dahabka ahaa degta u soo ritay, saaxibadiina sii nabad galyeyey, dabadeedna socdaal dheer waddada cagta saaray ilaa gurigii abtigii. Markuu hor yimid ee uu arriddii garaacay ayaa waxa ka furtay haweenay-dii abtigiis. Mar alla markay aragtay ayey yaab iyo amakaag afka la kala qaaday oo waxay ku hadasho garan wayday. Mar-kaasaa intay aad ugu fiirsatay wajigiisii iyada oo rumaysan la' indhaheedi u dhawaaqday ninkeegii, «Timirow! Timirow; alla! waa Saxardiid!» Timir baa markiiba tow soo yidhi. Hadduu indhaha ka qaaday Saxardiid waabu isku duubay, isaga oo kalgacalo iyo jacayl waalidnimo oo aan la koobi karayn ku soo dhawaynaya, kuna le, «Xageed ku maqnayd abti? Maqnaan-shahaagu nagu dheeraayaa!»

Gabadhii abtigii dhalay ayaa iyana ku soo oroday iyada oo ay qoorteeda ka lulato kuushii Saxardiid ololaxayda badda uga soo sameeyey Saxardiid baase markuu arkay qoslay oo yidhi, «oo kuushaasna wali ma haysataa?» Markaasay intay yar il-ka caddaysay ugu jawaabtay, «Waxan hubo ayey ahayd inaad kollay soo noqonayso, kuushana i waydiinaso!»

Haweenaydiise intay kiishkii uu sitay laacdya iyada oo qos-laysa, kuye, «Maantana maxaad Saxardiidow kiishkaaga ku jira?» Isna intuu qoslay uu kiishkii u fidiyey ayuu ugu ja-waabay, Waxan filayaa inaan maanta jilaab iyo kuul ololax-iyihii ku jirin.» Maxayse haweenaydii aragtay! Waxay ku odhan lahaydba dhuuntuu joogsaday, labada indhood baana soo baxay — waaba waxayna dhalatayoo riyana ku arag. Saxardiidna intuu qun yar kiishkii gacanta galiyey ayuu ka soo saaray silis dahab ah oo aan kaa soo kale la arag. Deeto intuu xaggii gabadha u jeestay oo u fidiyey ayuu yidhi, «Qaado kanaad kaga habboon tahay kuushii oloxaydee.»

Gabadhiina intay ka qaadatay siliskii iyada oo la dhac-san tidhi, «Waad mahadsan tahay; anigaase kuushii hore uum baa dahab kasta igala qimo weyn, sababta oo ah waa hadyadii u horraysay ee aad ii keentay!»

Muddo yar ka dibna inankii Saxardiid ee waxan og nahay oo dhib, balanbal iyo saxariir soo maray — rag waa kii kufee haddana kaca — ayaa noqday maalqabeen weyn oo la wada yaqaan.

Ugu dambaystii haddaba habeen habeenada ka mid ah ayaa gurigii Timir kalluun leh laga sameeyey damaashaad magaaladii oo dhami isku aragtay. Yaa loo sameeyey?.... Arooskii Saxardiid iyo ina-abtidii.

JAR-ISKAXUURKII YARAA

Anwar wuxuu ku fadhiyey kursi gaaban oo hoos yaallay geed weyn oo ku hor yaallay guriga aabbihii; waxanu dhabta ku haystay buug yar oo aad u qurux badan oo maalin hore, saaxiibkii Koosiyaak hadyad ugu keenay.

Inkasta oo buuggu dhabtiisa ku kala furnaa, hase yeeshii Anwar ma'anu akhriyeyn, maxaa yeelay, hamigiisa iyo qamigiisuba waxay ku maqneeyeen meelo fog oo aanu waligii soo jeed iyo riyo midna ku arag. meelahaas oo ka sawirtay qurxoododa iyo muuqsamaantooda, maankiisa.

Anwar wuxuu ahaa wiil yar oo Turki ah; kana mid ah dadka dega magaalada Istanbuul. Inkasta oo Anwar aanay daadiisu ka badnayn afar iyo tobani sano, wuxuu ahaa wiil yar oo jariskaxuur ah Aadna u dhijiran una jecel dalmarka iyo socdaalka. Dhib iyo adaygna u mudan jiray, baqdin iyo foojignaan la'aan, si uu kolba meel u cusub u soo arko. Sidaa darteed, Anwar wuxuu boqday dhul badan, kuna wareegay, dhexmarayna waddano badan. Kuwaas oo dadka deggan iyo dhulkaabaa uu wax badan ka ogaaday, kana bartay. In badan ayuu wiilkaa yari dhul aan weli inan yar oo da'diisa leegi raad dhiggin, maray. Sidaasi ha jirtee, haddana marna kama dhergin, kulka iyo xiisaha uu u hayey socdaalka iyo dhulmarka, jacayl-koodana kama damin.

Anwar waxa u fududeeyey in uu hamadiisa suuro galiyo, aabbihii oo maamule ka ahaa shirkad weyn oo lahayd dayuuradaha la raaco. Markaa waxa dhici jirtay in uu Anwar raaci jiray wadayaasha dayuuradaha aabbihii maamulo, meel meel dhow iyo meel fog hadba midkay duulayaan. Waxanu ka soo noqon jiray Socdaaladaa isaga oo riyaqsan, kuna faanaya waxa uu aqoon cusub iyo warar ka soo korodhsaday dal iyo iyo dadba wuxuu soo arkay

Intaa waxa u dheeraa isaga oo naf ahaantiisu noqday duuliye daran, kuna farsamo bartay saacado badan wadidda dayuuradaha, la,linta hawada dayuuradaha la'lalinayo iyo duulinta dayuuradaha, socdaalo aan yarayn. Isaga oo intaa ay la socdaan farsamo yaqaahada shirkada uu aabbihii maamulaha ka yahay.

Haddaba waqtigaa aan ka hadlayno muddo yar ka hor ayaa waxay Anwar isbarten inan la yiraad Koosiyaak, oo ah inanka buugga hadyadda ugu keenay Anwar. Anwar iyo Koosiyaak midba midka kale ayuu dabcigiisa jeclaystay. Kalgalcalo iyo saaxiibnimo adagina way dhexmartay. Markaa waxa dhacday inay marka ay is haleelaanba waqtigooda wada qaataan: hadday sheeko tahay, hadday ciyaar tahay iyo hadday tamashle iyo daansho-daanshood ay duurka iyo xeelliyyada u baxaan tahayba ilaa uu xidhiidhkoodii saaxiibtinimo qoto dheer yeeshay oo aabay noqdeen walaalo oo kale.

Koosiyaak haddaba ma'ahayn Turki sida Anwar, waxase uu ahaa wiil asalkiisu yahay dadka ku nool waddanada adduunyada ugu xiga woqooyi. Sidaa ahaanna wuxuu ka yimid dhulka Iskiimooga ee qabowga ku caan baxay. Halkaasoo ah meel barafku dhulka korkiisa qariyo sanadka oo dhan. Cadceed-duna ka qarsoon tahay bilo badan. Diirrimaad la'aan iyo iftiin la'aan — habeenka iyo dharaartu iyagu.. kala garashoba ma le.

Koosiyaak aabbihii ayaa muddo hore ka soo guuray dhulkaa, degayna magaalada Istanbuul oo ah magaalo ku taala waddanka Turkiga. Halkaas oo u noqotay waddankiisii labaad. Hasa ahaatee marnaba ma ilaawin dalkiisii iyo afkiisii, iyo hiddihii iyo dhaqankii dadkiisa. Sidaa si le'eg ayaa wiiliika Iskiimooga. Koosiyaak sida aabbihii ayaanu marna ilaawin dhaqankii iyo hiddihii dalkiisii hooyo iyo dadkiisa. Markii ay Anwar isbarteenna, wuxuu aad ugaga sheekheyey dalkiisaa fog, ee dadkiisuna ku nool yihiin guryo laga dhex jabiyeey barafka, cunnana hilibka bahalka la yidhaa «Dubbaha» (dubbuu waa xayawaan weyn oo qiyaastii leeg jeerta waddankeenna, dhogor adag oo badan-

na leh; kuna nool dhulka qabow ee woqoyiga fog). Dubba-ha oo dadkaasi ay xaydhiisana ku shitaan faynuusyada. Sidaa ayuu Koosiyak uga sheekayn jiray Anwar in dhulkooda sadanka oo dhami ka kooban yahay habeen kaliya oo dheer iyo dharaar kaliya oo iyana dheer (Sababta sidaasi ku dhac-dana weydii macallinka joqraafiga)

Haddaba markii uu Anwar qaataay sheekooinkaa dhaa-dheer ee ku saabsan dhulka iskiimooga ayuu u xiisoobay in uu socdaal ku tago, indhiisana ku soo arko waxyaalaha in-dhasarcaadka ah ee saaxiibkii uga sheekaynayo. Koosiyakna wuu ku dhiirriyey hamigaa; uria ballan qaaday in uu u raaco socdaalkaa. Sidaa darteedna wuxuu hadyad ugu keenay buug yar oo qurux badan oo ay ku taalo waxyaalo badan oo ku saabsan dhulka Iskiimooga.

Waana kaa Anwar oo ku fadhiya kursi, gurigooda hortiisa, dhabtiisana yaallo buuggaa yar ee aan soo sheegnay; hasa ahaatee xiskiisu wuu dhaafsanaa buugga; waxanu ku laalaa dalalka fog ee quruxda muuqooda aan la sifayn karayn. Wanu ku riyoonayey siday ugu suurtoobi lahayd booqashadaasi si uu indhihiisa ugaga soo dhergo aragtidooda.

Sidaa isaga oo Anwar u fadhiya ayaa waxa u yimid aab-bihii, kuye, «Maxaad ka fikiraysaa?» Anwar baa ugu jawaabay, «Aabbo waxa ii daran socdaal aan ku tago dalka Iskiimooga; waxaanan socdaalkaa is raaci doonaa saaxiibkayga rumaad Koosiyak. Waxaanan filayaa in aan ka soo kororsado aqoon dadka iyo dalkaba.» Odaygii baa intuu qoslay oo gacanta deg-ta ka saaray yidhi, «Alla, Anwarow, jariskaxuursanidaa! Oo aabbo, maxay dhulka fog ee cidlada ah aragtidoodu kugu soo kor-dhinaysaa, adoo arkay dhulka badan oo ka qurux badan, kana muuq san?»

Anwar taasi umay dhicin, wuxuuna ka hoos yidhi, «Ha-jirto; aabbose, maanay meeshu qayb dunida aynnu ku noona-hay ka mid ah, ahayn. Midda kale aabbo, socdaalkaasi waxba igu kicimaayo. Bas, waaba adoo noo oggolaada aniga iyo koo-siyyak in aannu qaadano dayuurad. Dabadeed waxannu ku soo noqon doonaa maalin amba laba.»

Odaygii wuxuu yidhi isaga oo kaftan hadlaya, «Iska ilow haloo-sigaa iyo hambagaa haatan, aabbo, — waxan kaaga baqayaa cidhib xumaanta jariska-xuurnimadaada.»

Isla mar ahaantaa, iyaga oo Anwar aabbihii sidaa u wada hadlaya ayaa waxaa ku soo baxay duuliye dhalin yar oo ka mid ah duuliyayaasha shirkadda; ahaana nin xagga Anwar u debacsan, una naxariis badan. Markuu ogaaday waxa Anwar iyo aabbihii dhex maraya ayuu odaygii ku yidhi isaga oo An-warna il kalgacalo ku eegaya, «Aniga ayaa sareeye maamule, diyaar u ah in aan Anwar iyo saaxiibkii ugu wehel yeeli socdaalkaa. Haddaad ii oggolaato in aan u wado dayuuradda. Waxana laga yaabaa in ay sidaasi kaa werwer tирто xaggiisa.»

Duuliyahaa dhalin yarada ihina wuxuu ka mid ahaa duu-liyayaasha sharikadda kuwa ugu gacan fudud, uguna farsamo iyo xeelad duuliyenimo badan. Sidaa darteedna odaygii ayaa ray'yigii waafaqay; waxanu oggolaaday in uu u duuliyu dayuuradda, Anwar iyo ciddii kale ee u raacaysaba socdaalkaa lagu tagayo dhulka Iskiimooga. Wuxuse ku adkeeyey in aanu socdaalkaasi ka badan laba maalmood.

II

Duuliyihii oo magaciisa la odhan jiray «Siraaj» ayaa wuxuu si daryeel ah ugu xadhko-xidhay socdaalkii uu u kaxaynayey Anwar iyo Koosiyak iyo ciddii kale ee asxaabtooda ah ee raa-caysa. Badhaadhaha Anwar maalintaa wuxuu ahaa mid aan la qiyaasi karayn. Wuxuu u riyaqsanaa suuro-galka ay u suuro-galayso in uu soo barto dal u cusub, soona arko caadooyin iyo dhaqamo ka facijciya — iyo muuqaalyo dhuga-sho leh. Wuxuu markaa diyaarsaday qalabkiisii; waxanu is-la mar ahaantaa warka xadhka xidhashada gaadhsiiyey saa-xiibkii Koosiyak. Sidaa si leegna wuxuu ku marti qaaday socdaalkaa laba wiil oo saabiibood ah, iyana martiqaadkii way ka aqbaleen — dabadeed gidi barbaartii ayaa guntinga is-ku wada giijisay.

..... Waxba yaanan hadal kugu daaline dayuuraddii ayaa kooxdii dhalinta ahayd la kacday oo hawadii magaalada istan-

buul la lashay. Dabadeed waxay kala gudubtay badda cad ilaa ay la dul martay badweynta Atlaantiga. Badweyntaa dusheeda hadday cabbaar kor lashay ayey deeto woqooyi bari haddana foodda u dhigntay. Waxay socotaba oo ay guuxa badisaba kolkay, qodhyaxadhe, wax yar u jirto magaalada «Doosh» ee ku taal dalka Aysland ayuum baa cirkii iyo dhulkiiba kol keli ah mugdi noqdeen, fad culus oo madoobina isasoo qabsaday — waaba dabayl xoog leh iyo duufaan iswata oo daadinaya dhagaxyaale baraf ah. Markaasaa firdhaar cad mooyaane cir iyo dhulba muuqood la waayey. Inankii Siraaj ee dayuuradda waday ayaa gees naba wax ka arki waayey,

Horo u socod iyo dib u socodba way ku adkaadeen, waayo wuxuu ka baqdin qabaý in ay dayuuraddu la jiidho buuraha waaweyn ee barafka ah, dabadeed ay burburto oo halkaa isaga iyo inta la socotaaba ku qudh baxaan. Guutadii yar yarayd iyaga baqdin iyo kurbad ayaa uurkooda rogtay, markay arkeen duufaanka ku wareegsan ee dhanaba ay dayuuraddoodii uga bixi la'dahay. Duuliyihii soomajeestaha ahaase uma bixin halistaa soo foodsaartay. Marnabana uurkiisa ma galin quus iyo calooyow; waxanu qun yar u tukubiye dayuuraddii jidkii woqooyi ee uu haystay, ilaa iyo intuu duufaanka ka bixi karayo . . .

Duuliyaha, haddaba, markii hore wuxuu talo-galkiisu ahaa in uu magaalada Doosh ku dego oo uu ka qaato saliid ay ku socoto dayuuraddu oo dabadeed uu halkaa ka wato socdaalkiisa; waxase beddeshay talo-galkiisii hore, duufaantan lama filaanka ku noqotay. Waxanu waqtigan dhibka badan fikrkiisa oo dhami noqday in uu raadsho xeelad uu kaga baxo ufa-dan iyo daruurtan; ugana nabab galiyo naftiisa, rakaabkii-sa iyo dayuuraddiisaba, halistan ku soo foole. Deeto una helo meel habboon oo uu ku dego. Waxasay dhibaatu ka dhac-day inta markaa daruurtu is haysay cirka ayaa aad u bal-laadhnayd, gees walbana kaga xeersanayd. Hadduu Fooniga kula hadal gegeda Doosh is yidhina, si uu u ogaado halka uu marayo, wuxuu ogaaday in uu aad uga fogaaday magaaladii

oo uu woqooyi u dabo go'ay. Waxbana markaa wuu ka maqli waayey raadiyihii; sababta oo ah guuxii duufaanka iyo dabasha iyo fogaanshihii ayaa codkiiba waxa aan la kasayn ka dhi-gay.

Waxay haddaba dayuuraddii daruurtii iyo duufaankii dhex wareegtaba, oo ay si indhalaa dhegeli iskaga hadaaftaba, waxaba iyana amuur la yaable noqotay, saliiddii ay bahasha dhami ku socotay oo ku dhawaatay dhamaad. Markan iyo taahan ninkii duuliyaha ahaa waxa la gudboonaatay in uu ka tashado sidii uu bahasha cagaha dhulka ugu saari lahàa, inta aan kaydkii saliiddu idlaan, dabadeed aanay gabigeeduba dhulka la quusin.

Waxase, nasiib-wanaag dhacay in mar keli ah duufaankii iyo dabayshii xasiloonaadeen, fadkii iyo dhedadii isqabtayna kala baaba'een. Markaana dabadeed ay u suurtowday duuliyihii in uu dhulkii arko. Haatan kaydkii saliidda goror yar ayuum baa dayuuraddii ku hadhay. Deeto isna qun yar qun yar ayuu u dejiyey dayuuraddii — ilaa ay taayiradii dhulka saartay. Hayeeshee, dayuuraduhu marka ay fadhiisanayaan halka ay cagaha dhigaan uun ma joogsadaane, waxa dhacda in ay waddo dheer oo loogu talo-galay, in door ah cararaan ilaa iyo inta ay quwad jabayaan. Haddaba markay wax yar barafkii dul carartay ayey duqaysay buür baraf ah — ilayn waddo loogu talo-galay ma jirto meesha tane. Markaasaa waxa ka baxay dayaan weyn oo dhegaha qarxinaya. Duuliyihii iyo afartii saaxiib markaa waxa u caddaatay in dayuuraddii halowday oo ma-kiinadaheedii mid iyo raadiyihiiiba burbureen. Waxase kha-saarahaa dayuuraddoodii gaadhad ilowsiyyey oo ay mahad Eebbe u noqeen, geerida foosha xun ee ay ka nabab galeen.

III

Haddaba markii hawadii hagaagtay ee dunidii xasiloonaa-tay, ayaa waxa u suurtowday wiilashii in ay arkaan meesha tan maqaadiirtu ku soo tuurtay sida ay tahay. Waaba lama

deegaan aan ballaadhiisa la qiyaasi karayn. oo ka samaysan baraf isqabtay gees ka gees. Markaasay talo isku soo koobtay oo arrinkoodii mur iyo yaab noqday. Wax alla waxay ku tashadaana garan waayeen — waar waa amuur la yaab lehe, waa qarfo xoosh ah oo dhan walba isballaadhisay . . .

Iyaga oo markaa walwal iyo dhabano-hays ku jira ayaa waxa sheed uga bildhaamay shawlad markab; waxayna markaa xaqiisadeen in ay bad u dhowyihin. Hase yeeshieeintaanay kaba fikirin baddan u dhow iyo markabka bildhaantiisu muuqato, ayaa waxay maqleen codad meel aan ka dheerayn ka soo baxaya. Isla wax yar dabadeedna waxa taagaggii barafka dhexdooda kasa soo baxay koox ah dadka iskiimooga ah oo sidata leebab iyo midiyo. Kooxdu qun yar qun yar ayey ugu soo dhawaanayeen iyaga oo cadho iyo colaadi indhahooda ka muuqato.

Wiilashii ayaa inta baqdin iyo anfariir galay midba mid isku maray. Markaasay xaggii badda jalleecdeen, hasa ahaatee, markabkii showladdisu muuqatay waabu qarsoomay — ilayn muuqaalkiisuba wehel buu ahaa. Waa iyagii iyo qarfadan cid iyo ciirsila'da ah. Nimankii Iskiimooga ahaana qunyar iyo digtoonaan ayey ugu soo dhawaanayeen.

Inankii Anwar ayaa nimankii hoosta ka tiriyey. Waa kow iyo labaatan nin oo dhaadheer oo xoog waaweyn oo ballaadhka garbahooda aad yaabto. Intoodan dhalinta ahna mid keli ah oo nimankaa Iskiimoogga ah dherer iyo dhumuc ugu dhig-maya kuma jiro. Markaasuu isagii oo farkanaxsan is yidhi, «Tolow, maxay nimankani noo malaynayaan inaanu nahay? Maxayse naga doonayaan?»

Su'aashaas oo kale mid wal oo saaxiibadii ka mid ah madiixiisa ayey ku wareegaysay... Sidaa soo kale ayaa duuliyihii Siraajna u yaabbanaa oo boqolaal su'aalood isweydiinayey. Giddiigoodse ma jirin mid jawaab isku qanciya. Hadalna

meeshaba ma' ool. Xaalkiise qadhaadhaa, oo halis ayaa gid-digoodba soo foodsaartay.... Dhib walbase dhabbo lagaga baxo lama waayo, ilayn Koosiyaaq ayaa asalkiisii hore Iskiimoog ahaa oo aad u yaqaanay caadooyinka dadka dhulkan dega. Markaa intuu si dhiirran colkii soo socday ugu dhaqaaqay, ayuu bunduqii oo uu gacanta ku hayey dhulka ku tuuray.

Dabadeedna intuu labada gacmood madaxa saaray, ayuu ku hadlay afkii Iskiimooga oo yidhi, «Waxanu nahay dad walaali-hiin ah. Wax colaad ahna idiin kulama socon. Middiyanma sidano.» Sidaa Koosiyaak wuxuu ku muujiyey in uu yahay nin caadooyinka dalka si fiican u yaqaan. Markay niman-kii arkeen wuxuu Koosiyaak adinka ka tusay, maqleen wuxuu afka ka yidhi, ayuu durba wejigoogii isbeddelay oo ay indha-hoodii ka muuqatay in isafgarad soo dhow yahay. Markaa-saa dhawr iyaga ka mid ihi u soo dhawaadeen Kiisiyaak oo is hareero taageen, kana warransiiyeen una warrameen. Intii kalese digtoonaantoodii ayey ku taagnayeen oo inamadii kale ayey isha ku hayeen, iyaga oo weli uurkooda waswaas iyo kal-sooni la'aani ku jirto.

Iswaraysigii Koosiyaak iyo nimankii Iskiimooga ahaa dhexmarayey muddo aan yarayn ayuu socday. Kolkii uu dhammaaday baa la aamusay. Nimankiina xasiloonaan iyo kalsooni muujin ayaa wejigoodii ka muuqatay. Arrintiina waxyay hadda u ekaatay in iyaga iyo Koosiyaak go'aan gaadheen. Dabadeed kii ugu joog dheeraa uguna gadh weynaa ayaa intuu u soo dhawaaday Koosiyaak oo warankii uu sitay Koosiyaak hortiisa ku tuuray, yidhi, «Waxaanu nahay saaxiibadiin. Mi-diyanma ma sidano. Magacaygana waxa la yidhaa «Naajook»..»

Markaa deeto raggii Iskiimooga ahaa ayaa wiilashii kale ku soo dhaqaaqay, Koosiyaakna intuu saaxiibadii ku soo caray ayuu istaga oo u digaya yidhi, «Iska jira inaad nimanka ga-can qaadaan. Hadday midkiin la hadlaanna, kaasi waa in uu sheego magaciisa, yidhaana, «Waxan ahay saaxiibkaa. Mid-dina ma sito» waayo, intaasi waa odhaahda kalgacalada ee ay isku salaamaan Iskiimoogu.»

Wiiplashii sidii uu Koosiyaaak kula taliyey ayey yeeleen waa-xana halkaa ka suuro-galay in ay iyaga iyo nimankii Iskiimooga ahay isafgartaan. Dabadeedna Naajook oo ahay madaxii Iskiimooga ayaa khubbad soo dhawayn ah oo aanay wiilashii erayana ka kasiin, halkaa ka jeediye. Koosiyaaak baase giddi-geed gartay oo u tarjumay saaxibadii. Ka dib markuu Naajook hadalkii soo dhawaynta ahay dhameeyey, ayaa nimankii xag-gii reerka u dhaqaqeem wiilashiina way dabagaleen iyaga oo wax yar ka dambeeyaa sida uu ku amray Naajook. Waayo wuxuu ka cabsaday haddii wiilashu dabasocodaan aad ugu dhowyihii in ay ragga gadaal ka weeraraan. Digtoonaanta Naajookna waxay caddaynaysay in aanay weli kalsooni weyn ka qabin xagga wiilasha. Baqdinna ka qabeen in wiilashu xeelad u qarsoon la maaggaan yihiin. Sidaa soo kale ayaa wiilashuna uga cabsi qabeen nimanka.

Waxay nimankii socdaanba oo wiilashiina dabasocdaanba, waxay soo gaadheen xaafaddii u horraysay ee Iskiimooggu degganaayeen. Waxay noqotay xaafad yar oo ka kooban dhawr buul oo gaagaaban, amase waxaynu odhan karnaa qalwooyin laga dhex qoday taagag baraf ah. Dadkii Xaafadda degganaa oo markaa iyagu maqlay imaatinka colka «martida» ah ayaa isku soo baxay yar iyo weyn, haween iyo carruurba, kana hor-yimid martidan yar yar.

Haddaba iyaga oo Iskiimoogii ku hawshan soo dhaweyntii martida ayuum baa mar keli ah uun qaylo iyo buuq isla oog-saday. Iskiimoogana waxa u caada ah in ay dhaqdaan eey waaweyn oo badan oo u jiidda carabadaha barafka dushiisa. Eeydaana waxay ku xereeyaan xero weyn oo ku taal xaafadda faygeeda. Markii haddaba qayladii iyo gurxankii ay maqleean ayaa waxay garteen in balaayo ka dhacday xeradii eeyda. Halkii bay ka gurmadeen, Anwaraa eeygiisii «Roore» oo u dayuu-radda la soo raacay ayuu markiiba cidiisii ka dhex gartay tii eeyda kale; Markaasuu xaqiisday in uu kollay tegay xera-da eeyda Iskiimooga, oo dhexgalkii uu dhexgalay, isaga oo mee-

shii qalo ku ah, ay isku boodeen isaga iyo eeydii kale Halkaana qaylada iyo gurxanku ka bilaabmay

Waxaanu Anwar malaystay in eeygiisu dhexgalka uu dhex-gaiay eeydan waaweyn ee cunaaga ah uu halis ku jiro. Waxanu ka yaabay in ay kalaba goostaan. Dabadeed halkii buu ka cara-ray oo u gurmaday.

Dayrka xerada eeyduna sidaa uma dheerayn oo Anwar markiiba wuxuu arkay eeygiisii oo dagaal ba'an kula jira eeydii kale. Haatanna kuba dhaw in dhulka la dhigto. Markaasuu intuu u adkaysan waayey aragtidaa foosha xun, ayuu kor ugu booday dayrkii oo dusha uga baxay. Waxaanu haddaлагаag u arkay eeygiisii oo lix eey hareeraysay, dirqi iyo tuxunna sutida u haya. Si allaale si uu isku nabadgaliyana garan la'. Anwar wuxuu markiiba gartay in haddii uu wax yar oo dambe sugo, dugaagani la kala tegi doonaan eeygiisan yar. Dabadeedna intuu dayrkii ka booday oo eeydii ku dhex dhacay — lugta soo qabsaday eeygiisii oo dayrkii ka soo laliyey, isla mar ahaantii-na isyidhi adna bood oo ka baxso baladan xoonsan. Eeydii baa show; inta ay ka gadoodday ka boobkii laga boobay-fariisaddii, giddigood kol kali ah weerar jac ku siiyey inankii An-war. Gigtii weerarka oo ku-soo-boodo ku noqotay judhi wax-ba iska dhicin kari waayey oo markiiba intuu barafkii ku sib-laday jir jir cadka u dhacay. Eeydiina iyaga oo cadho iyo aar-gocsad la qawdhamaya boob dugaagnimo ah micida iyo cidida u naceen. Waxaybana dhigteen halkii uu ka nabadgaliyey eeygiisa.

Inankii Anwar baa naftii iskugu timid. Eeydii dugaaga ahaydina waxayba ka dhigtay rag ay kala boobayso. Hasa ahaatee, Naajook oo isna gurmadka ugu soo horreeyey way la neqon weyday in inankaa yar ee isaga u martida ah halkaa geeri fool xun, ku dhex dhinto eeydaa. Deeto intuu xeradii u booday ayuu eeydii warankii dabada u qabtay. Dhowr kale oo Iskiimoogii ihina intay iyana dayrkii ka soo daateen ayey war-

mahoodii la galeen ilaa eeydii ay gees uga wada eryeen, hal-kiina ka soo qaadeen Anwar oo labada lugood iyo labada gac-moodba dhiiggu ka da'ayo.

V

Habeennimadii ayaa qalwadii Naajook oo ahayd ta ugu weyn xaafadda lagu qabtay martisor wacan oo lagu maamuu-sayo martidan yar yar. Qalwada, oo sidaan soo sheegnay ka samaysnayd baraf, waxa gudaheeda lagu iftiimihey faanuus-yo laga qoray dhagax laguna shiday xaydha eeyda badda. Wax yar ka dibna waxa la keenay cashadii. Wuxaanay mar-tidu ku fadhiyeen dakado yar yar oo laga qoray barafka oo la-gu dul goglay haragga dubbada. Irriddii qalwada,, hadda, waxa ku soo xoomay carruurtii iyo eeydii, dumarkiina gadaa-shooda ayey soo joogsadeen iyaga oo giddigood dhuganaya mar-tidan yar yar.

Sheeko badani ma dhex marin martidii iyo qoladii loo mar-tida ahaa. Wuxoogaa su'aala ah oo gaagaaban ayuu Koosi-yaak u jeedihey qoladii, isaga oo ka wakiila saaxiibadii. Naa-jookna sidaa si leeg ayuu waxoogay su'aala ah u soo jeedihey. Markii wax yar sidaa waraysi la isku dhaafsatay, ayuu Naa-jook sara kacay oo hadal yar jeedihey oo yidhi, «Martidu way-daalan tahay, waxana markaa habboon in ay seexdaan. Wa-xaan dabadeed u wadayaa halkii ay seexan lahaayeen. Subax-da hadday gaadhana waxaynu u raaci doonaa ilaa dayuuradoo-dii si ay uga soo qaataan waxay uga baahan yihiin. Hadday markaa la noqoto in ay guuraan, waxaynu ku caawin doonaa eeydeenna carabadda jiidda kuwa ugu xoog waaweyn. Si mar-kaa ay u tagaan ilaa, meesha ay rabaan iyagu.»

Halkaa markay arrintii marayso ayaa waxa inankii Anwa-madaxiisa ku soo dhacay markabkii meesha fog ka muuqda ee haddana ka qarsoomay. Markaasuu Koosiyak warsada bal in uu iyaga weydiyo. Hase yeeshay mar alla markii su-aashii ka soo baxday dabnaba Koosiyak ayaaba qoladii mar

kali ah uun jidhiidhico gashay. Wajigoodiina cadho iyo did-mo ku duusho. Markaasuu Naajook cod dheer oo beddelan ku hadlay, yidhina, «Markab in uu inoo dhow yahay waa mid aan jirin, mana suurtoobi karto in halkan maraakiibi timaado. Ragga cad ee maraakiibta aad sheegaysaan badda mariyaana futo ay ugu soo dhawaadaan dhulkaan baraflayda ah ma laha!»

Ninkii odayga ahaa markuu erayadaa dambe lahaa waxa hadalkiisa ka muuqatay cadho iyo hanjabaad qarsoon oo uu uga digayo yar yarka inay su'aal dambe oo ku saabsan mar-kabka soo jeediyaan.

Yar yarkii, markaa, yaab baa Alle u keenay oo waxay ku hadlaan bay garan waayeen, markay maqleen hadalkii oday-ga iyo cadhadii colka. Wuxa ka yaabisay dafiraaddan indha-ha loo galiyey; waayo, iyagu siday wadkooda u hubeen ayey u hubeen in markab sheedda ka muuqday; shawlladiisuna intay cabbaar sii bildhaamaysay, deeto qarsoontay. Iyana markaa hiyiga ku qabteen; hadday soo dhawaato, inay raacaan oo dhulkoodii ku tagaan. Nimankan Iskiimooguse waa kuwan dafiray in meeshaba markab ka muuqday; si qarsoona u hati-gay yar yarkii, iyaga oo aan wax sabab ah siin, hadday su'aashaa soo celiyaan.

Eegmada nimankaa Iskiimooga ahi waxay ahayd mid dhinbiilo cadho ihi ka duulayeen — ilaa iyo intii ay yaryarku soo hadal qaadeen markabka; sidii waxay su'aashuba tahay meel-ka- dhac aan la qaadan karin ah. Waxabana nimanka ka muuqatay didmo, sidii waxay masiibo weyni ku dhacayso had-day yaryarku ogaadaan markabka iyo arrimihiisa.

Iimika iyo haatan nimankii Iskiimooga ahaa iyo nimankii yaryaraa ee martida ahaa waxa ka dhex dhacay shaki, didmo iyo aamin darro. Markaasaa qolaba qoladii kale ka fishay in ay halisi kaga timaado oo foojignaan colaadeed kala gashay.

Haddaba markii wiilashii tageen buulkii loogu talagalay in ay seexdaan, ayaa Anwar saaxiibadii u xanshashaqay oo yidhi, «Waar bal mid baan idin leeyahaye si fiican ii dhagaysta; shaki waxaan ku jirin in meeshatan markab ka dhaw yahay. Qoladan Iskiimooga ihina ogaan bay u dafirayaan; waayo si uum bay ugu baqanayaan in aynnu markabkaa wax ka ogaan.»

Duuliyihii Siraaj baa isna ka qaatay oo yidhi, «Runtu waxy tahay in meeshatan markab ka muuqday; labadaydan in-dhoodna waan ku arkay markay shawladiisu sii libdhaysay. Waxase nimankan Iskiimooga ah ka muuqatay, oo aan qofna ka shaki qabin in ay been cad indhaha inoo saarayaan, inkasta oo aan la yaabbanahay waxa beentaa ku kalifaya.»

Koosiyaak baa isna hadalkii ku dambeeyey oo yidhi, «waan idinku raacsanahay sidaa aad sheegteen; waxanan aaminsanahay in sir halis ihi ku jирto waxa ku kalifay ninkii odayga ahaa ee Naajook in uu been inoo sheego. Inkasta oo sidiina oo kale aanan garanayn waxa arrintu ka kacayso, hase ahaatee taa ku daalimayno. Waxase ka daran in nimankan aan martida u nahay inaga shaki qabaan oo aanay inagaga kalsoonayn xagga nabadjelyada. Mar hadday taasi dhacdayna waxaan murran ku jirin in innaga naf ahaanteenu aan halis ku jiro. Markaa waxay ila tahay in aan digtoonaano....»

Habeenkii halkiibay wiilashii ku baryeen iyaga oo baqdin iyo walwal ka qaba in Iskiimoogu ku soo gudaan oo ay qudhaba ka wada jaraan. Baqdintaa awgeed inankii Anwar laba indhood iskuma gayn habeenkii oo dhan. Sidaas oo kale ayuu duuliyihii Siraaj u soo jeeday oo sharqanta u dhagaysanayey. Markii waagii dilaacayna waxay ku tashadeen in ay tagaan halkii dayuuraddu fadhiday si waxa ay soo qaadan karaan uga soo qaataan: waxana la raaciyyey koox Iskiimooga oo ilaalisa.

Markay goobtii tageenna Siraaj ayaa wuxuu isku dayey in uu haghagaajiyo dayuuraddii. Nasiibdarroose shilka gaadhey bahasha ayaa ba naa oo meel uu kaga hagaago ayuu garan waayey; hasa yeeshii ma niyad jabin waxaanu isku dayey in raadiyoogii sameeyo; bal si haddii uu taab kale rogi waayo, ay ugu suurowdo in uu taar si uun ula gaadho garoonada dayuuradaha kuwa ugu dhow oo dabadeed loogu soo gurmado. Waxase kale oo haddana soo baxay in halkii dabka dayuuradda dhalinaysay ay digaandigta noqotay oo aan markaa sinaba raadiyoogii loo suubin karin. Dabadeed intuu madaxa lulay, tiiraanyo awgeed naftiisa la hadlay oo yidhi «Ma waxa naloo qoray in aanaan sinaba uga baxsan lamadegaankan ciarsi la'aanta ah.»

Markaasuu Anwar u xanshashaqay oo yidhi, «Oo miyey-naan markabkii sheedda inooga muuqday, haddaynu gaadhi karno, ku baxsan karin.» Koosiyaak baase afka goostay oo yidhi, «Hus! eray dambe oo markabkaa ku saabsan ha dallicin, sababta oo ah waad og tahay qoladan, sida ka muuqata, ma doonayaan in aynnu, haba yaraatee, waxba ka ogaano markabkan isaga ahe. Markaa iska jir yaanay sheeka sheekadaadu inagu dirin nimankee.»

VII

Maalin labaadii iyo maalin saddexaaddii ayaa wiilashii halkii ugu dhamaatay iyaga oo nolosha ay kula dhaqan yihiin Iskiimoogu tahay mid baqdin iyo kalsoonni darro ah; mar ay dhammaan doontana aan la ogeyn. Waxayse iyagu kartidoodii isku dayeen in ay nimankan u muujiyaan weji furaan si ay uga bi'yaan colaadda iyo uurxumaanta. Hasa ahaatee nimankii Iskiimooga ahaa iyaga xaggoodii kalsoonni iyo aamin wuu ka dheeraaday. Waxay kula dhaqmeen yaryarka ilaalo yo dabajiig heegan ah. Isla waqtigaana wuxuu odaygii reerku amar ku bixiyey inay koox farsamo — yaqaan ihi diyaariyaan carabad weyn oo ay ku guuraan martidu, geysana meel allaale meeshii ay doonayaan — ujeeddadii marti aan la rabin oo la iska madalufinayo — Dariiqad kale oo ay ku jid ma-raanna ma jirin.

Isaga Jawaad oo meesha ugu yaraa, intuu joogitaankii ku dheeraaday, ayey walwal iyo walaac uga baxday. Mar-kaasuu Koosiyaaak ku yidhi, «Hadmay carabadda samayskee-du dhammaanayaa; oo ayhu meeshatan cidla'da ah ka tegi doonaaee» Kiisiyaak baa ugu jawaabay, «Iyagaaba ambaba-xeenna innaga jecel. Miyaanad arkayn siday gees walba in-nooga joogaan ee ay innoo ilaalinayaan, una degdegsanayaan tagitaankeen?» «waa runtaa» ayuu yidhi Anwar, «Oo cayn-tayduba waan arkaa sidaa. Waxana muuqata in markabkii isaga ahaa arrin qarsoodi ah oo aanay marnaba jeclayn in aynnu ogaanno, ay ka danbayso. Sababtaa darteed, baanay tallaa-badeenna u ilaalinayaan, uguna dadaalayaan in aynnu si dhak-hso ah uga ambabaxno.»

Siraaj baase yidhi, «Hasa ahaatee, gaadiidka ay innoogu talogaleen in aynnu ku socdaallo ma aha mid meel dheer inna gaadhsiinaya, sinabana innoo dhaafinaya degmadan xarkag-san. Markaa waxa lagama maarmaan ah in aynnu isla meel dhigno xeelad kale oo aynnu ku baxsanno. Markabkaas oo aynnu si uun ku dhaadhno maahee si kalena ma arko.»

Halkaasay yaryarkii tashi faq ah isku dhaafsadeen, isna qanciyeen in aan nimankan Iskiimooga ihi marnaba u oggolaanaynin in ay tagaan markabka, sirtiisana ogaadaan. Sidaa darteedna waxay xaqiisadeen in hamiga ka galay tagidda markabka ay tahay dhiirranaan qaawan iyo jariskaxurnimo. Inkasta oo ay taasi jirto haddana kama muuqan meesha xeelad kale oo ay lafahooda kaga la baxsadaan xaaladdan sirgacan ee ay ku jiraan. Waxayna talo ku gaadheen in ay biimadaa ku dhiirradaan — hubsasho iyo digtoonaani waa halkeedee.

Anwar baa dabadeed intuu yarahe fikiray yidhi, «Mar haddaanay carabadda la innoo samaynayaa inna gaadhsiinayn carro la deggan yahay oo ka baxsan lamadegaankan bafarka ah, aniga iima muuqato wax aynnu ka helayno. Isla mar ahaanta faa'iido aan ka helayno gaadhit?anka markabka, ma jirto sa-

babta oo ah markabka laftiisa ma raaci karno iyaga oo sidan inooga ilaalinaya. Waxa kale oo jirta, sidaan anigu sheedda uga arkayey markii shawladda markabku soo muuqbaxday haddana u libidhay, waxay ila noqotay in muuqaalka shaw-laddu siloonaa. Markaa waxaban u malaynayaa in markabku yahay mid degay oo aanay halkaana waanwaan safar inoogu jirin.» Midhkaa Anwar taabtay waxay wiilashii kale galisay quus rajo iyo waanwaan la'aan.

VIII

Isla markaa ay talo sidaa ugu caddaatay saaxiibadeen ayuum baa waxay maqleen guux dayuuradeed oo hawaday sare ka soo baxaya. Deeto iyaga oo saadaal cuudooni kalkoo-da gashay ayey giddi samada kor u wada eegeen. Nasiibdar-rose dayuuraddii ayaa sidii xidig cirjiidh ah ilbidhiqsi ugaga gudubtay korkooda. Hadday qarsoontayna uurxumaantii iyo yididiilo la'aantii baa dig ugu soo noqday.

Isaga oo calaacal dabinta qaniinsan ayuu yidhi Koosiyaaak, «Waxan u malaynayaa Anwarow in aabbahaan ku joogay dayuuradda cirka gudubtay, sababta oo ah xilligii soo noqod-keena ahaa way dhaافتay. Shaki la'aana taasi aabbahaan kol-lay walwal bay gelisay; waana kaa dayuuradda gaarka ah soo kaxaystay.» Jawaad oo meesha ugu yaraa, kalyo nugayl daraadiina wajigiisii dhiigu ka tagay baa yidhi, «Laakiinse waa kaa iska tegay, inamana arag... oo ma lamā dagaankan uun bay-nu joogi ilaa aynnu dhimano oo aan cidina inna rag....»

Duuliyihii Siraaj baa isna yidhi, «Markaan guuxii dayuu-radda maqlay ayaan labada gacmoodba cirka u taagay si ay inoo arkaan. Nasiibdarose innaga oo barafkan cad dul joogna way adág tahay sida la inoo arkaa. Haddii hadda raadiyooga dayuuraddu inoo shaqaynayo, waan la hadli lahaa oo way garan lahaayeen goobta aan joogno.»

Intaan Siraaj hadalkiisa dhamaynba ayaa waxa inankii Anwar ku soo boodaý fikrad. Waanwaan cusubina dabnihii-sii ku dhigtay, kuye, «Armaa laga yaabaa in markabkaa badh degay sabab u noqdo nabad galyadeena».

Duuliyihii baase xusuusiyey, «Ha yeeshee, sow adigii lahaa, markabku wuu degay oo dibna uma sabbayn karo, sidee buu sabab ugu noqon karaa nabad galyadeenna?»

Anwar intuu booday oo sare joogsaday kuye, «looma baah-na in aynu waqtigeenna hadal ku lumino, innaga oo wuxuun ku dhaqaaqi karna. Anigu waxan hubaa in hadda giddi duu-liyayaashii reer Alaska (Woqooyi Ameerika) oo dhami innaga dhex raadinayaan gunburahan barafka ah; markaa waa in aynnu si uun u ogaysiinaa halka aynnu joogno, ee inna mari-ya ilaa markabka »

Iyaga oo aan midna garan waxa ka dhexeeya markabka badh aasan iyo haloosigiisa ah siday dayuuradaha raadinaya ugu sheegi lahaayeen halkay joogaan, ayaa saaxiibadii Anwar aamusnaan ku daba kaceen ilaa goobtii markabku yiillay.

Gaadhitaanka meesha markabku yaallo naf ahaanteedu wax sahan ma ahyn. Waayo waa mide ma ay garanayn kob-ta ay tahay. Ta labaad waxay ogaayeen in aanay marnaba Iskiimoogu u oggolaanayn inay markabka agtiisa tagaan. Sidaa darteed waxa lagama maarmaan noqotay in ay tab iyo xeelad; iyo foojignaan siyaado ah ku socdaan ilaa ay gaadha-yaan markabka, ha jirto in aanay wali ogayn waxay ka dhee-fayaan gaadhidiisee.

Koosiyaak baa, deeto, yar basaasid u tegay xaggii Iskiiboo-ga. Hadduu soo noqdayna wuxu ku yidhi saaxiibadii, «Niman-kii Iskiimoogu waxay warmaha u qaateen ugaadhsi. Waxayna i soo fareen in aynnu ugaadhsi u raacno.»

Anwar baa hadalkii ku gooyey, «Waxba kuma jabna taa-si. Waynnu raaci. Bixitaankaasina wuxuu inoo noqon fur-sad aynu xeeladdeenii ku meel marino!»

IX

Ugaadhsigii bay, dabadeed wiilashii isku diyaariyeen. Mid walibana bunduq ayuu degta u ritay; Anwar baana hor kacay iyaga oo colkii Iskiimooga ahaana hor ~~socdaan~~. Ururkii baa markaa socoto galay. Naajookna wuxuu ku taliyey in isku-duubnaan loo wada socdo si aan qofna ugu ambban bafaraka. Anwar baa isna saaxiibadii u il jabiyyey. Markii hal cabbaar ah ay socdeen baa duqii Naajook, intuu jidkii ay haysteen gees ugu leexday, yidhi, «Waxa innaga horaysa meel jin iyo cafaa-riidi ku nooshahay, ee waa in aynnu ka baydhnaa. Markaa midigta inoo soo duwa.» Anwar baa intuu gartay waxa eray-gaa cabsiinta ah ka dambeeya, u xanshashaqay Siraaj oo bar-bar socday oo yidhi, «Eegay, ma doonayo isagu in aynnu hor-teennaa saani u soconno, oo aynnu xeebta gaadhno, waayo mar-kaa markabkii baynnu arkaynaa.» «Haa! » buu ugu jawaab Siraaj, «waa sidaan sheegayey.

Sidaa xaalka ay Anwar iyo Siraaj u fahmeen ayey Koosi-yaakna ugu dhacday. Markaasuu intuu u soo dhowaaday iya-ga, hoos ahaan u yidhi, «Cirku wuxuu u egyahay sidii oo u duufaan soo kacayo dhawaan. Markaa marka duufaankaasi soo kaco, u hoos galiya oo dhuunta, anna colkaan idinka jeedi-nayaaye. Wax yar ka dibna waan idinka daba iman doonaa.» In diqsi loo xiiro ka dib ayaa samadii fad madow isa soo qab-saday. Markaasaa dabayshu foodhiday, jay baraf ihina hor-toodii sida roobka ugu dhacay oo wajiga ku dhuftay. Markii waxba la kala arki waayey ayaa Iskiimoogii ku dhagac siiyeen, dhufays ay ka galaan duufaanka. Intii bay Anwar iyo saa-xiibadiina ka faa'iideysteen oo intay colkii ka baydheen, jid-kii wax yar ka hor laga soo leexday, cagta saareen iyaga oo si dhiirran uga hortagaya duufaanka dhinbilaha barafka ah kicinaya.

Gunbur baraf ah oo iyaga iyo badda kala qarinaysay markay dusha uga baxeen ayaa waaba baddii oo markabkiina meel xeebta u dhow hawaaran yahay. Muuqaalkaasi wuxuu ku dhaliyey xamaasad iyo mitid. Ilbidhiqsi ka dibna waxay gaadheen baddii oo markabkii ayey ag tageen. Markabkuna wuxuu ahaa maraakiibtan shixnadda gurta ee waaweyn; hase ahaatee wuu badh-degay oo fuqdi hore ayuu la galay barafkii

X

Jariskaxuuradii yar yaraaayaa markay markabkii oo badh degay oo sina halkii uu janbiga la galay aan looga riixi karayn arkeen ayaa misoole guuldarro wejigooda ka muuqatay oo arrin ku gariirtay. Anwar baase intuu giddigood indhaha kaga dhacay ku qayliyey; kuye «Waar ha baqina; mar haddaynu markabkii soo gaadhayna, shaki la' si uun baa wax inna anfaaca aynnu uga heliye. Markaasuu deeto ku wareegay markabkii oo dhan walba ka maray ilaa uu ugu dambaystii helay daaqad jaaban. Halkii buu dabadeed ka galay; saaxiibadiina ka soo daba galeen; Hase yeeshay yaab baa alla u keenay markay markabka gudihiisii arkeen. Waayo alaabtii markabka dhex tilay oo waxay arkeen aad mooddo in caruuri ku ciyaartay oo wax waliba dhulka daadsan yahay. Markaasuu Siraaj yidhi, «Anigu sidaan ku aqaanno naakhuudiyayaasha maraakiibta, sinaba ugama suurtowdo naakhuudiye in markabkiisa oo sidan isku dhex yaalla uu ka tago.»

Jawaad yare ayaa ka daba qaataay, oo yidhi, «Haa, oo waxaan ninaba la weyddinayn in ay Iskiimoogu yihiin kuwa sidan wax yeelay. Waxana waliba cad in ay waxan ay daadaadiyey maahee intii kaleha qaateen.» Koosiyak baa inta wax u kala baxeen, yidhi, «Allaylehe, waa runtii. waxanan u malaynayaa waxay la argagaxeen markaynnu markaoka too-yannay in ay sidaa tahay. Waayo waxay ka baqeem in aynnu sirta kashifno, oo aynnu tuugadooda soo bandhigno. Waxa cad in ay ka faa'iideysteen markii markabku xeebta fuqa la soo

galay oo ay xadeen. Iyaga oo ogsoon in taa ciqaabteedu tahay xadhig. Qoladii markabka lahaydna aanay marnaba ugu dhaafayn dambigaa ay galeen.»

Anwar intii saaxiibadii waxaas oo hadal ah isdhaafsanyaen wuxuu ku hawlanaa doondoona shay isaga aad ugu muhiimsanaa, isaga oo saaxiibadii aanay garan wuxuu raadinayo. Markuu shaygii indhaha ku dhuftay, ayuu qaylo kaga kacay, «Waan helay! helay! waa kan!» Saaxiibadii baa dhagac ku soosiiyey xaggiisii — waaba Anwar oo dhabanada haya raadiyoo yar oo ah nooca maraakiibta iyo dayuuradahu ay ku dirtaan taarka marka ay gagooyinka iyo dekedaha u soo dhowyihii. Mar allaale marii uu Siraaj arkay raadiyoogii ayaabu farxad kala dilaaci gaadhay; kuna qayliyey, «Haddaan nabad galnay! haddaan nabad galnay! waxaynnu la qabsan madaarka inoogu dhow! oo aynnu waydiisan dayuurd gurmad ah.»

Anwar baa ku nuuxnuuxsaday, intuu raadiyoogiina kor u qaaday, «Waan hubay in kollay markabka laga helayo raadiyoo; sidaa darteedna waxan idinku soo dhiirriyey in aynnu markabka, wax kastaa hadday inna qabsanayaan, soo ga...hno. Nasib wanaagna badowan Iskiimooga ihi way macno garan waayeen raadiyooga, markaa way iskaga tageen iyaga oo aan waxba yeelin. Imikana inna mariya xaggii reerkii u yaacnee, intaanay colkii qaflad inagu qaban.»

XI

Markan iyo haatan duufaankii ayaa xasiloonaaday. Fadiiina wuu baaba'ay, oo arladii baa iftiin wada gaadhay. Yar yarkiina iyaga oo midba mid daba gurguuranayo ayey ka soo daadageen daaqaddii markabka oo u kaceen xaggii reerka. Intaanay gunburtii yarayd ee barafka ahaydba ka dhaadhicin ayaa waaba Naajook oo dhinbiilo cadho ihi indhihiisa ka duulaayaan, gadaashisana ay Iskiimoogii oo iyana wada karsani safan yihiin.

Qun qun yar ayaa mid wal oo yar yarkii ka mid ihi ba dhidid qabow oo baqdineed labada kilinkilo ka dareeray, markay arkeen masiibada hortaagan. Wax yar markay aamus-

naayeena ayey waxoogaa dhiirranaan ah intay iska baadheen yidhaahdeen, «Mugdigii duufaanka dartii ayaanu jidkii ka lunay; annaga oo aan waxba iska ogayn waxa aannu is aragnay annaga oo halkan joogna» Naajook oo cadho laba in-dhood la guduuteen baa hadalkii ku jaray oo, kuye, «Waar khiyaamo intaasi iigu filan mar i dage allaha dago, mar labaad idagana anaa isdagay — imikana i hor kaca ilaa reerkii.»

Codkaa hatigaadda iyo hanjabaadda ihi iyaga oo uu sii baqdin galiyey ayey hadal la'aan ku qaateen amarkii oo hor kaceen waddadii ilaa reerka, iyaga oo Iskiimoogiina daba socdaan; Anwarna ku kogsan yahay raadiyoogii yaraa.

Meesha ay joogaan iyo reerkuna way kala fogaayeen; markaa goor fiid ah ayey soo gaadheen reerkii. Markay wiilashii galeen buulkii ay seexanayeen, ayuu inta Naajook albaabkii duusha kaga xidhay ku yidhi, «Haatan iyo wixii ka dambeeya halkaa ayaad maxaabiis ku tiihin, ilaa odayaasha reerku ar-rintiina ka fadhiisanayaan oo ay go'aan ka gaadhayaan.»

Markasuu dabadeed ilaaliyaal hub sita, irrida horteedii, ku amray inay ilaaliyaan. Saaxiibadeen iyaga oo dhibtii iyo halgankii ay maalintii soo galeen la tiiciya ayey kala daateen, hase ahaatee baqdin iyo walwal awgii libiq hurdo way ku soo dhici wayday. Duuliyihii Siraaj isagu wuxuu isku hawlay raadiyoogii in uu ku diro gurmud-dalab madaarada iyo dayuura-daha u dhaw. Hasa ahaatee codadkii uu raadiyoogu soo ta-binayey waxay noqdeen kuwo aanu waxba ka maqlan, manuu-se quusan waanu isku dayey in uu ku guulaysto

Isla goor waqtigaa ah, ayaa Koosyaak arkay meel darbigii daloosha oo show Iskiimoogu ilaaween inay awdaan. Markasuu Anwar u gaagaabsaday, «Daloolkaas baan ka baxaynaa oo waxaan soo basaasaynaa waxay colkii innoogu talinayaan, ee i sii suga» Markasuu dabadeed intuu dalolkii sidii bisadda ka dusay ayuu xaggii ay Iskiimoogu ku shirayeen u kacay.

Is-kiimoogii iyagu markaa waxay shir weyn, oo Naajook ka guddoonshe yahay, uga fadhiyeen arrinta wiilasha. Naajook baa hadalka watay oo yidhi, «Wiilashan aan marti-galinay ee aynnu soo dhawaynay, sida naxariista lehna aynnu ugu kaal-maynay, way innagu xad gudbeen oo thirteenii bay inoo dabaka-waydaarteen. Imika iyo haatanna haddaynu sidaa ku sii dayno oo aynu nolol kaga tagno way inna fashili doonaan. Markaasna ceeb ayaa dhici doqnta oo qoladii markabka lahayd ayaa ogaan doonta in aynnu markabkoodii xadnay, taasi waxay noqon doontaa in tuugnimo la' innagu xidho oo xabsiga la inoo taxaabo oo deeto aynnu sidaa xornimadeenna ku wayno. Markaa maxay idinla tahay ee aan yeelnaa, si aynnu ma-siibadaa inna soo foodsaartay uga nabadgalno.?»

Raggii meesha fadhiyey oo dhan ayaa inta cadho ka badatay ku dhawaqaqay kol kali ah «Waa in ay geeri mutaan! gaa-lada yar yari!» Dumarkii iyo carruurtii oo gadaashooda taagnaana way ka daba dhawaqaqeen, «Waa in la laayaa malaa ciinta!»

Inta waxaas oo dhami dhacayeen, Koosyaakna mugdiga ayuu ku dhabarayey oo intuu gidaarka dhegta saaray ayuu dhagaysanayey. Markuu go'aankoodii maqlay ayuu cabsi la gariiray; hasa yeeshi intuu iska calooladaygay ayuu xaggii saaxiibadii u soo gabaala gurdeeyey, si uu go'aanka fajicisada leh ee nimankii ku tashadeen u gaadhsiiyo.

Duuliyihii Siraaj isagu raadiyoogii ayuu ilaa hadda ku hawlanaa si uu meel uun ula hadli karo, isaga oo yar yarkiina hareero fadhiyaan wejigiisana ku eegayaan indho farkanaxsan. Mar kali ah ayuum buu qayliyey sidii wuxuu dad u arkayo u la hadlayo, «Halkan baanu joognaa! halkan baanu joognaa! haloo! haloo! Waxan ahay duuliyihii Siraaj. . . . , waxana ila jooga Anwar, Koosyaak iyo Jawaad halkan baanu joog-

naa dhulka wada barafka ah ... Ma i maqlaysaan? ha! ha! noo soo dhowaada. Halis baanu ku jiraa. Buul yar oo Iskii-moogu leeyihiin baanu maxaabiis ku nahay.... barafka kor-kiisa Miyeydaan na arkayn? laydhka dayuuradda kolba gees u duwa, si ad noo aragtaan Miyeydaan weli reerka dusha ka arag? Maya! maya! nooma suurtoobayso in aanu dab shidno.»

Deeto wuu aamusay, saaxiibadii baanu sidaa u eegay oo ku yidhi, «Dayuurad cirka maraysay ayaan la hadlayey, si fii-can baanuna isku maqlaynay. Nasiibdarro way garan wey-day halka aynnu joogno. Wuxaan u malaynayaa in Anwa-roow aabbahaa ka mid yahay dadka la socda.»

Anwar baa intuu hiyi kacay yidhi, «Aabahay, oo muxuu inoogu soo degi waayey?» Siraaj baase madax lulay oo ugu jawaabay, «Nasiibdarro goobta aynnu dhulkaan wada barafka ah degannahay ayaanay garanayn. Wuxaanay inaga doona-yaan in yannu dab shidano, si ay dabkaa u soo eegtaan oo deeto gartaan halka aynnu joogno. Haddase in badan bay inaga fo-gaadeen.

Jawaad yare ayaa si quus ahaan ah u yidhi, deeto, «Oo ma halka uun baynnu joogi ilaa Iskiimoogu inna gawr gawracaan?» Isla goortaa ayaa Koosiyaak oo wajigiisu anfariir iyo kurbad la madoobaaday dalaq ka sood yidhi dalolkii kuye, «Iskiimoogii in aynnu dhimano ayey ku goosteen!»

Anwar baase markiiba booday kuye, «Wallaahi in ayanaan halkan ku dhimanay! waa in aynnu nabad galhää ee ina-mariya xaggii markabka u baxsanee, illaa waa in aynnu dab shidanaa, si aabbahay iyo colkiisu halkaynu joogno u arkaan oo inoogu soo dagaan waar inna keena xaggii markabka u yaacnee!....»

Siraaj baa isaga oo yaabban yidhi, «Oo sidaynu markabka odhan doonaa Haa! haa, waa in aynu aabbahaa iyo colka la socda si uun u tusnaa kobta aynu joogno. waa in aynu dab

shidnaa. !» Anwar baa si dhiirin galin ah u yidhi, «Waxan idin leeyahay, ina mariya! ilaa markabkii!»

Koosiyaak baa fikiray, deeto, «Caqligaaga dib ugu noqo, Anwar, qoladiina waxay ku tashadeen in ay inna laayaan — markaa bal u fiirso arrintaa. Ilayn tegidda markabku iyaga inaga dhicin maysee.» Siraaj oo isagu iska qaylinaya ayaa yi-dhi, «Waa in aynnu ilaa wa illaa dab shidnan dab, ay qo-lada ina raadcaynaysaa innagu soq eegtaan.»

Anwarse dhieg uma dhigin hadalka Siraaj iyo kan Koosi-yaak midna ee intuu dalolkii darbiga fudhu ka yidhi ayuu isku siidaayey ilaa markabkii... Saaxiibadiina iyaga oo aan kas iyo maan midna ku jirin bay daba galeen. Mugdigii ba-a-na u kaalmeeyey oo ma uu arag ninkii irridda buulka ilaalina-yey. Mar ay cabbaar ka dambaysay uum baanu dareemay madhnaanta meesha. Markuu irriddii furay, uu qofnaba ku arki waayey, ayuu isku qaaday xaggii reerka oo samada ka qay-liyey, «Way baxsadeen! way baxsadeen!»

Anwar iyo saaxaabadiise sidii ay u yaacayeen ayey markab-kii gaadheen. Anwar baa dabadeed markiiba intuu daasad qaataay ayuu meel naafsto ku jirtay soo daray, oo qoryo ku tuu-laayeen ku dul shubay deeto dab qabadsiiyey. kol alla kol-kii ololkii cirka isku ganay ayaa waaba Naajook iyo Iskiimoogii oo dhan oo hubkoodii' sita. Markay isku soo qaadeen xaggii yar yarka ee laaya is yidhaahdeen baa inta Koosiyaak ku qayliyey yidhi, «Istaaga! oo halkaa aad joogtaan ha ka soo dhaqaqaqina! haddii kale waxa idinku dhaca kuma jirno! Saaxiibadyo oo idinka xoog iyo hub badan ayaa cirka nooga soo degaya ee is jira!»

Hanjabaaddaa Koosiyaak markay maqleen Iskiimoogii ayaa cabsiyi yar gashay oo dib u yar joogsadeen. Ha yeesh ee haddana mar labaad bay weerar soo qaadeen. Siraaj ilaa had-da raadiyoogii buu kula hadlayaa dayuuradda cirka lalaysa «Ma na arkaysaan? Soo eegta halka dabku ka shidan yahay. Soo dega! dhakhsada halis baanu ku jirnaa!»

Dabadeed intaan Iskiimoogii mar labaad soo kulin yar yar-kii, ayaa waaba dayuurad guuxeedii cirka iyo dhulkaba dha-meeyey oo qun qun yar soo degaysa. Hadday dayuuraddii ar-keen Iskiimoogii — waa ilaahow ila baxso —, cagahaabay wax ka dayeen.

Dayuuraddii iyadu markay cagaha dhulka soo dhigtay baa duuliyihii ka soo degay, deeto kaaliyihisii, dabadeedna An-war aabbihii, oo isagu judhiiba u soo lalay xaggii inankiisa. Halkaasay labadii isdhalay kalgacayl iyo xiise is kugu soo boodeen; isaga oo odaygii ku habatacaya «Eebbaa mahad kule nabad galyadaada! Eebbaa mahad leh nabad galyadiina giddi-giin. . . . !»